# JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

## WASAARADDA SHAQADA IYO HORUMARINTA SHAQAALAHA

# SHARCIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLADDA LAMBAR 11

**BAYDHABO, DECEMBER 5, 2006**

# TUSMADA SHARCIGA SHAQAALAHA

TUSMO (CONTENTS)…………………… ………...BOGGA (PAGE)


1. TUSMO………………………………………………….............. 1 – 4

- QAYBTA I: QODOBBO GUUD

2. ERAYBIXIN…………………………………………………….. 5 - 7

3. SAAMAYN……………………………………………………. 8

- QAYBTA II: QAABKA

4. QAABKA IYO HEERARKA…………………………………… 8 – 9

- QAYBTA III: SHAQO SIINTA

5. SHURUUDAHA SHAQOSIINTA………………………………. 9

6. GUDDIGA HUBINTA IYO QIIMAYNTA SHAHAADOOYINKA. 10

7. WEYDIIN QORIS SHAQAALE…………………………………. 11

8. SHAQAALAHA AAN AQOON GAAR AH LOOGA BAAHANAYN. 11

9. SITAYAASHA SHAHAADOOYINKA WAXBARASHO …………. 11-12

10. SHAQO QORISTA SHAQAALAHA XIRFADLAYAASHA AH……. 12-13

11.IMTIXAANKA IYO QORISTA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLADDA……………………………………………….. 13

12. SHAQAALAHA GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA ………... 13

13. CIQAABTA……………………………………………………….. 13

14.ANSIXINTA QORITAANKA SHAQAALAHA………………….. 14

15.DARAJOOYINKA BILOWGA AH EE JAAMICIYIINTA LAGU QAADAN KARO………………………………………… 14

16 .DARAJADA BILAWGA AH EE FULIYEYAASHA IYO FARSAMOYAQAANNADA ……………………………………. 15

17.DARAJADA BILAWOGA AH EE KARRAANAYAASHA…….. 15

- QAYBTA IV: TIJAABADA IYO JOOGTAYNTA SHAQO QORIDDA

18.MUDDADA TIJAAABADA SHAQAALAHA CUSUB…………… 15

19.SHURUUDAHA QORIDDA LAGU RASMIYEYN KARO……….. 16

20.SHAQO KA SAARIDDA QOFKA TIJAABADA KU JIRA……… 16

- QAYBTA V

21.WAAJIBAADKA SHAQAALAHA……………………………… 16–17

22.WAXYAABAHA KA REEBBAN QOFKA SHAQAALAHA AH.. 17-18

23. DHAAR ………………………………………………………………….. 18
24.WAQTIGA SHAQADA…………………………………………….. 18
25.MAGDHGA KHASAARAHA AY KEENAAN SHAQAALUHU……. 19
26.AMARKA MADAXDA OO AAN SHARCIGA WAAFAQSANAYN .. 19
27.DEYNTA DAWLADDU KU LEEDAHAY SHAQAALE……………... 19

- QEYBTA VI: FASAXYADA

28.FASAXYADA SHAQAALAHA…………`……………………………… 20-22
29.DIB-ULA-NOQOSHADA FASAXYADA……………………………… 22

- QAYBTA VII: DALLACAAD, DARAJO DHIMID, ERGIN BEDDELAAD IYO SHAQO DIBADEED

30.DALLACAAD SHAQAALE…………………………………………... 23
31.GUDDIGA DALLACAADDA, ABAALMARINTA IYO ANSHAXA EE HAY'ADDA……………………………………… 23-24
32.ANSIXINTA DALLACAADAHA……………………………………… 24
33.DARAJO DHIMID……………………………………………………. 24
34.ERGIN SHAQAALE………………………………………………….. 25
35.BEDDEL SHAQAALE……………………………………………….. 25
36.SHAQAALAHA SHAQO DIBADDA UGU MAQAN………………… 26
37.KALA MUDNAANTA SHAQAALAHA ISKU DARAJADA AH……. 26

- QAYBTA VIII: ANSHAXA

38.TALLAABOOYINKA ANSHAXMARINTA SHAQAALAHA………. 26-27
39.QAADIDDA TALLAABOOYINKA ANSHAXA……………………….. 27-29
40.HABKA QAADISTA DACWADAHA ………………………………...... 29-30
41. SHAQO KA JOOJIN………………………………………………….. 30
42. JOOJIN DHACDO ANSHAXEED ILAA LAGA DHAMAYNAYO DACWO CIQAABEED………………………………………………… 30

43. KU QAADID DACWO ANSHAXEED SHAQAALAHA LAGU WAAYO DAMBI CIQAABEED ……………………………………………………………………… 31

- QAYBTA IX: DHAMMAADKA XIRIIRKA SHAQADA

44. SHAQO KA TAGIS ..…………………………………………………………….………. 31
45. SHAQO KU CELIN ………………………………………………………….…… 31-32
46. SHAQO KA FADHIISAD DA'A AWGEED ……………………………….…... 32-33
47. SHAQO KA FADHIISIN CAAFIMMAD DARTIIS …………………………….…….. 33
44. SHAQO KA SAARID SABAB ANSHAXEED, XUKUN MAAXKAMADEED AMA SHAQO KA MAQNAANSHO

MUDDO DHEER CUDURDAAR LA'AAN ………………………………………………………… 33
45. SHAQO KA SAARID XAQ LA'AAN………………………………………………………….. 33-34

➢ QAYBTA X: FARSAMOYAQAANKA

46. MAAMULKA FARSAMOOYINKA ………………………………………………………… 34
47. MAAMULKA FARSAMOYAQAANNADA ………………………………………………… 34
48. DALLACAADDA FARSAMOYAQAANNADA……………………………………………. 34 - 35
49. IMTIXAANKA QIIMAYNTA HEERKA AQOONTA EE FARSAMOYAQAANNADA IYO XIRFADLAYAASHA……………………………………………………..…………… 35
50. HEERKA AQOONTA XIRFADLAHA ….…………………………………………….. 35 - 36
51. FARSAMOYAQAANKA SARE EE U GUDBAYA AQOONYAHAN …………………….. 36
52. AQOONYAHANNADA……………………………………………………….……… 36
53. SHAHAADADA DUGSIGA DHEXE ………………………………………….……… 36
54. SHAHAADADA DUGSIGA SARE EE CAADIGA AH…………………….……………… 36
55. QORITAANKA FARSAMOBARADKA…………………………………………….…. 37
56. GUDDIGA QARANKA EE FARSAMADA ………………………..……………………… 37-38
57. XILKA GUDDIGA QARANKA EE FARSAMADA ……………………………………….. 38
58. DHAQAN GELINTA SHARCIGAN ……………………………………………………… 38
59. LIISKA FARSAMADA LA AQOONSAN YAHAY …………………………..…………… 38-39

QAYBTA XI: BADBAADADA SHAQAALAHA IYO GUNNOOYINKA

60. BADBAADADA SHAQAALAHA …………………………………….…………………... 39
61. GUNNOOYINKA SHAQAALAHA ..……………….………………………………………. 39

➢ QAYBTA XII: HAWLGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA

62. NIDAAM GUUD ……………………………………..………...……………………. 39 - 40
63. SHURUUDAHA LAGU WAAYI KARO HAWLGABKA IYO LIILTIRKA ………………. 40
64. SHAQO KA RUQSAYSI ……………………………………………………………….... 41
65. MAALIYADDA HAWLGABKA……………………...……………………………………… 41
66. HAWLGABKA NAAFONIMO…………………………………………….……………… 42
67. HORUMARIN HAWLGAB………………………………………...…………………….. 42
68. QOFKA SHAQAALAHA AH EE SHAQO QARAN KU GEERIYOODA…………………… 42
69. XANNAANADA CARRUURTA WAALIDKOOD DHINTAY ………………………………. 43
70. GEERIDA CAADIGA AH EE SHAQAALE AAN HAWLGAB GAARIN…………………. 43
71. WAAYITAAN IYO JOOJIN HAWLGAB ..…………………………………..……. 43
72. OGGOLAANSHAHA IYO BIXINTA HAWLGABKA IYO LIILTIRKA ..……………….. 44
73. HAWLGAB IYO LIILTIR AAN LA WAREEJIN KARIN …………….………….. 44

74. HABAYNTA MUSHAAROOYINKA AASAASIGA AH EE SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLLADDA. …………………… 44
75. HESHIIS SHAQO ……………………………………...……………… 45
76. BURIN …………………………………………………..…………….. 45
77. DHAQAN GELID SHARCI…………………………………………… 45
78. LIFAAQA 1-AAD: A, B, C, D. …………………………………………… 46-49
79. LIFAAQA 2-AAD: DARAJOOYINKA XIRFADLAYAASHA, FARSAMOYAQAANNADA IYO AQOONYAHANNADA ……………. 50
80. LIFAAQA 3-AAD: LIISKA FARSAMOOYINKA LA AQOONSAN YAHAY ………………………..…… 51-58

# QAYBTA I
# QODOBBO GUUD
## QODOBKA 1-AAD
## ERAYBIXIN

**Erayada soo socda, haddaan sharciga gudihiisa si kale loogu fasirin, waxaa loola jeedaa sida eray walba ku hor qoran:-**

- (**Golaha Wasiirrada**):- Waxaa loola jeedaa Ra'iisalwasaaraha iyo Wasiirrada.

- (**HEER**):- Waxaa loola jeedaa Darojooyin isleh oo israacsan (grades) iyo jaranjarooyinkooda (steps) sida lagu tilmaamay Qodobka 4-aad iyo lifaaqyada ee Sharcigan.

- (**Qoys**):- Waxaa loola jeedaa qofka shaqaalaha ah afadiisa (ama afooyinkiisa)/ninkeeda, carruurtiisa/carruurteeda aan weli da'doodu 18 sano gaarin iyo ciddii kale ee uu masuul ka yahay/ka tahay sida ku cad Xeerka Qoyska Soomaaliyeed.

- (**Darajo**):- Waxaa loola jeedaa qaybaha heerarka loo kala saarayo (grade).

- (**Madaxa Hay'adda):** waxa loola jeedaa:
  **(b)**Madaxweynaha Jamhuriyadda
  **(t)** R'iisalwasaaraha Xukuumadda
  **(j)** Wasiir wasaarad qaabilsan.

- **(Sarkaal)**:- Waxaa loola jeedaa madax hay'ad Dawladeed oo sharci lagu Dhisay hase yeeshee aan wasaaradna hoos imaanin.

- **(Mushaar)**:- Waxa loola jeedaa lacagta uu shaqaaluhu bil walba xaq u leeyahay in la siiyo, sida ku cad lifaaqyada sharcigan.

- (**Hay'ad Dawladeed**):- Waxaa loola jeedaa Madaxtooyada, Xafiiska Ra'iisalwasaaraha, Wasaarad, Wakaalad, Dawlad Hoose, Bankiga ama Mashaariicda Dawladdu leedahay ama qayb ku leedahay,Guddiyada Qaranka iyo Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka.

- (**Hawl qaran**):- Waxaa loola jeedaa hawl kastoo Qaranku leeyahay kana turjumaysa danta guud ee Qaranka.

- (**Garsoor**):- Waxaa loola jeedaa Hay'adaha Garsoorka.

- (**Abaaldhurte**):- Waxaa loola jeedaa qofka shaqadii Dawladda ka fariistay kaddib markii uu, ugu yaraan, soo hayay 20 sano oo xiriir ah, ama sidaas uu sharci u oggolaaday. Qofkaasi wuxuu mutaystay inuu bil kasta farigiisa ku qaato lacag abaalgud u ah xooggiisii dhallinyaranimo iyo shaqadiisii uu dalkiisa hooyo gashaday muddadii uu shaqada dawladda soo hayay (**Abaaldhurtenimo = Pension**). **Hawlgab iyo Halwgabnimo** waa erayo kale oo uu isla micnadaas Sharcigani u adeegsaday.

  - (**Shaqo = Occupation**): waa howl qofka awood u siin karta inuu barto kana shaqeeyo gacanta ama maskaxda.

  - (**Farsamo = Trade-Craft**): waa hawl xirfadeed una baahan in shahaado ama aqoonsi lagu kasbo loona yeesho waayo-aragnimo dhinaca xirfadda gacanta iyo tiyooriyad la xiriirta.

  - (**Farsamobarad = Apprentice**): waa qof ku jira tababar si loo gaarsiiyo heer kaaliye Xirfadle, ama Xirfadle aan ka mid ahayn Hay'adaha Dawladda.

  - **Kaaliye Xirfadle:** Waa Qofka Shaqaalaha caadiga ah ka xeeldheer, Waayo-aragnimada iyo Aqoontiisuna gaarsiisnayn Heer Xirfadle.

  - (**Xirfadle 3-aad**): Waa qof waaya-aragnimo ama Laylis ku kasbay Xirfad gacmeed Kana gudbay Imtixaanka qiimeeynta ee Heerka Saddexaad.

- **(Xirfadle Dhexe = Xirfadle 2-aad)**: Waa qofka awood u leh Cillad helid iyo Bixin, iyo baddalid xubin Qalab Farsamo, gudbayna Imtixaanka Qiimaynta Xirfadda ee Heerka 2-aad.

- (**Xirfadle Sare = Xirfadle 1-aad**): Waa qofka awooda u leh cillad helid iyo Bixin, garan karana sababtii cilladda keentay kuna darsaday tiyooriyaddii loo baahnaa, gudbayna Imtixaankii qiimaynta Xirfadda Heerka 1-aad.

- (**Farsamayaqaan 3-aad**): Waa qofka haysta shahaadada dusiga sare ee Farsamada ama shahaado u dhiganta.

- (**Farsamayaqaan Dhexe = Farsamayaqaan 2-aad)**: Waa qofka marka uu dhammaystay dusiga sare ee farsamada qaatay:
  (**b**) Ugu yaraan 2 sano oo tababar la xiriira cilmiga shaqadiisa.
  (**t**) Ugu yaraan sannad tababar farsamo oo la xiriirta cilmiga shaqadiisa kuna shaqeeyay ugu yaraqan laba sano tababar ka baxsan.

- (**Farsamayaqan Sare = Farsamayaqaan 1-aad)**: Waa qofka isagoo haysta shahaadada dusiga sare ee farsamada qaatay ugu yaraan laba sano oo tababar farsamo la aqoonsanyahay kuna shaqeeyay farsamadaas ugu yaraan saddex sano tababarka ka bacdi.

- (**Aqoonyahan = Professional)**: Waa qofka haysta shahaado jaamacadeed oo farsamo ama farsamoyaqaan sare oo ku soo gudbay imtixaan qiimayn farsamo.

- **(Qaybta farsamoyaqaannada) =** Waxa loola jeedaa qaybta sharcigan ee lagu maamulayo farsamabaradka, kaaliye xirfadle, xirfadle , farsamayaqaannada iyo aqoonyahannada.

- **Erayga farsamayaqaannada** waxa guud ahaan loo isticmaalayaa arrimaha qaybta sharcigani saamaynayo oo dhan, iyo Farsamoyaqaanada F.3, F.2, & F.1 marka si gaar ah loo isticmaalayo.

## QODOBKA 2-AAD
## SAAMAYN

a. Sharcigani wuxuu dhaqayaa Shaqaalaha joogtada ah ee Dawladda.

b. Sharcigani ma saamaynayo :-

(b) Madaxda Qaranka ee xafiisyadooda ama xilalkooda doorashada ku yimid.

(t) Shaqaalaha aan joogtada ahayn ama kuwa Heshiisleyda ah ee Dawladda u shaqeeya.
(j) Shaqaalaha ka tirsan Hay'adaha gaarka ee aysan Dawladdu dhinac ka ahayn.
(x) Dadka ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida iyo kuwa Ciidan ahaanta u habaysan.

## QAYBTA II
## QAABKA
## QODOBKA 3-AAD

(1) Jago kastaa waxaa ay leedahay Darajo, Waajibaad iyo Masuuliyad lagu aqoonsanayo Magac kooban, sida **A, B, C, D.**

**(2)** Tirada guud ee jagooyinka Hay'adda ee loogu tala galay miisaaniyadda Dawladda iyo Jagooyinka aan lacag loogu tala galin waxa ay isku wada noqonayaan qaab-dhismeedka hay'addaas, waxaana nidaamin doona Xeer gaar ah.

## QODOBKA 4-AAD
## HEERARKA

(1) Waxaa jira Heerarka soo socda:-

- Heerarka (**A**) iyo (**AY**) Madax Maamul iyo Aqoonyahan.
- Heerka (**F**) Farsamoyaqaan oo ah qof haysta shahaado dugsi sare ama mid ka sarraysa ee Farsamo ama shahaado u dhiganta.
- Heerka (**B**) Fuliye.
- Heerka (**C**) Karraani.
- Heerka (**X**) Xirfadle ama shahaado qiimayn xirfadeed.
- Heerka (**D**) Adeege, Ilaaliye iwm.

(3) Heer kastaba wuxuu yeelanayaa Darajooyinka iyo jaranjarooyinka ku

tilmaaman Lifaaqyada Sharcigan iyo mushaar goyntiisa loo xilsaaray Guddi gaar ah oo ay xubnihiisa ka mid yihiin Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Shaqada & Horumarinta Shaqaalaha, Bankiga Dhexe, iyo Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

.

**QAYBTA III**
**SHAQOSIINTA**
**QODOBKA 5-AAD**
**SHARUUDAHA LAGA DOONAYO QOFKA LA SHAQAALAYNAYO**

Qof kastoo Shaqo Dawladeed la siinayo waa:-

(1) In uu ahaado Soomaali.

(2) In da'diisu aysan ka yarayn 18 sano.

(3) In uusan qabin cudur ka reebaya gudashada waajibaadka shaqada loo qorayo.

(4) inuusan lahayn dembi ka reebaya in uu noqdo shaqaale dawladeed (interdiction) sida uu qabo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed..

(5) In uu lahaado Shahaadooyinka looga baahan yahay jagada loo qaadanayo kuwaasoo kala ah:-
   (b) Shahaadada Jaamacadda ama mid u dhiganta, marka jagadu ay tahay heerarka (A) iyo (AY).
   (t) Shahaadada Dugsiga Sare oo caadi ah ama mid u dhiganta marka jagadu tahay (B10). Hase yeeshee haddii uu Shahaadada Dugsiga Sare ula jiro tababar farsamo iyo Shaqo aqoon gaar ahaaneed ugu yaraan labo sano waxaa lagu qorayaa Darajada (B9).
   (j) Shahaadada Dugsiga Dhexe ama Shahaado u dhiganta waxaa lagu qorayaa Darajada (C11). Hase yeeshee, haddii ay Shahaadada Dugsiga Dhexe ula jiraan tababar farsamo iyo ugu yaraan labo sano oo waayo-aragnimo shaqo ah waxaa lagu qorayaa Darajada (C10)

(7) Inuu haysto caddayn ah inuu qori karo akhriyina karo Af Soomaaliga.

## QODOBKA 6-AAD
## GUDDIGA HUBINTA IYO QIIMAYNTA SHAHAADOOYINKA

Guddiga Hubinta iyo Qiimaynta Shahaadooyinku wuxuu hoos yimaadaa Wasaaradda Tacliinta Sare oo u xilsaaran qiimaynta shahaadooyinka la aqoonsan karo, wuxuuna ka kooban yahay :-

(1) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tacliinta Sare- Guddoomiye.

(2) Guddoomiye-ku-Xigeenka Jaamacadda Ummadda - Xubin.
(Inta ay Jaamacadda Ummaddu dib uga hawl gelayso, waxaa booskiisa sii buuxinaya khabiir uu magacaabay Wasiirka Tacliinta Sare).

(3) Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha ee Wasaaradda Shaqada & Horumarinta Shaqaalaha - Xubin.

(4) Agaasimaha Waaxda Qorshaha ee Wasaaradda waxbarashada iyo Barbaarinta - Xubin.

(5) Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed. – Xubin

(6) Wakiil ka socda Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda - Xubin

**Waajibaadka Guddiga waxaa ka mid ah:-**

(1) In uu samaysto Xeer hoosaad nidaaminaya shaqadiisa.

(2) Inuu qiimeyo shahaadooyinka la hor keeno kaddib marka uu hubsado Runnimadooda.

(3) Inuu raadraac ku sameeyo shahaadooyinka lumistooda looga soo cawdo.

## QODOBKA 7-AAD
## WEYDIIN QORIS SHAQAALE

(1) Hay'adaha Dawladdu, marka ay u baahdaan shaqaale, waxay weydiisanaayaan Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda iyagoo dalabkooda nuqul ka siinaaya Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha.

(2) Guddigu, wuxuu jiritaanka baahida shaqaale ee loo soo bandhigay kala tashanayaa Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha, wuxuuna sida ugu dhaqsaha badan ugu dhaqaaqayaa labadan tallaabo midkood:

(**b**) Wuxuu hay'adda dalabka u soo gudbisay u dirayaa tartamayaal shuruudaha shaqaalaha la doonayo leh oo horay imtixaan uga soo gudbay **Liiska Kaydka**na ugu soo jiray muddo aan ka badnayn **laba bilood**.

**(t**) Wuxuu dalabka shaqaale iyo shuruudaha looga baahan yahayba ku faafinaysaa wargeysyada , Raadiyayaasha iyo "Website"-yada.

(3) Qoridda Shaqaalaha waxay noqonaysaa tartan furan oo loo siman yahay.

(4) Shaqaalaha qoriddooda waxaa loo raacayaa habka shaqo-qorista shaqaalaha ee sharcigani tilmaamayo iyo wixii habraac kale ah ee uu Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladdu u dejiyo.

.

## QODOBKA 8-AAD
## SHAQAALAHA AAN AQOON GAAR AH LOOGA BAAHNAYN

Qoritaanka Shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahnayn oo ay ka mid yihiin adeegayaasha iyo ilaaliyaasha ee loo qorayo Hay'adda Dawladda, Shirkadaha iyo hay'adaha gaar ahaaneed, waxaa qoritaankooda u xilsaaran Guddiga Maamullada Gobollada iyo Degmooyinka, kuwaasoo si caddaalad ah u soo xulaya dadka buuxiya shuruudaha ku xusan qodobka 5-aad ee Sharciga iyo kuwa u gaarka ah jagooyinka Shaqaalaha loo doonayo.

## QODOBKA 9-AAD
## SITAYAASHA SHAHAADADA JAAMACADDA

Qofkii aan horey Dawladda ugu soo Shaqaynin ee Shaqo warsada, isagoo sita Shahaado lagu qiimeeyay heer jaamacadeed ama wax u dhigma, waxa uu marayaa imtixaan tartan ah haddii ay jiraan jamiciyiin kale oo la tartamaysa, haddii kale waxaa lala yeelanayaa "**interview**".

## QODOBKA 10-AAD
## SITAYAASHA SHAHAADADA DUGSIGA SARE

Sitayaasha Shahaadada Dugsiga Sare ama wax u dhigma waxay marayaan imtixaan tartan ah haddii ay jiraan dad la tartamaya, haddii kale waxaa lala yeelanayaa "**Inter-view**".

## QODOBKA 11-AAD
## SITAYAASHA SHAHAADADA DUGSIGA DHEXE

(1) Sitayaasha Shahaadada Dugsiga Dhexe ama wax u dhigma, waxay shaqada gali karaan marka ay soo maraan kuna guulaystaan imtixaan tartan ah, imtixaankaasoo uu maamulayo Guddiga Qaranka ee shaqaalaha Rayidka Dawladda ee ku xusan qod. 13-aad ee Sharcigan.

(2) Qofkii ku gudbay imtixaan ee loo qaato Shaqada Dawladda waxay hay'addiisu siinaysaa tababar gaaban iyo wacyigalin.

## QODOBKA 12-AAD
## SHAQO QORISTA SHAQAALAHA XIRFADLAYAASHA AH

(1) Shaqosiinta Shaqaalaha Xirfadlayaasha ah ee aan sidanin Shahaadooyin, waxay ku xiran tahay Imtixaan tartan ah oo uu qaadayo Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda,isagoo la kaashanaya dadka aqoonta u leh Xirfadda Imtixaanka la qaadayo.

(2) Manhajka lagu imtixaanayo dadka wuxuu noqonayaa kan u degsan qiimaynta Xirfadleyda.

(3) Xirfadlayaasha Imtixaanka gudba ee Shaqada la qoro waxaa mid walba lagu Mushaar siinayaa heerka Darajada Xirfadda uu u gudbey, hase yeeshee Xirfadlaha laguma meelayn karo, marka uu Shaqada gelayo, wax ka sarreeya Darajada Xirfadle 2-aad.

(4) Dadka ka gudbey Imtixaanka ku sheeggan Qod.11-aad iyo qodobkan, hase yeeshee aan Shaqo loo dirin Jagooyinkii oo buuxsamay awgeed, waxaa lagu hayn karaa liiska kaydka ah muddo 2 bilood ah, haddi ay hay'ad shaqaale soo warsato jagooyin la mid ah kuwii shaqaalaha kaydka ahi Imtixaankooda gudbey, waxaa shaqada loo qori karaa iyaga oo aan Imtixaan laga qaadin, hase yeeshee Hay'adda qoranayso waxay la yeelanaysaa "Inter-view".

## QODOBKA 13-AAD
## IMTIXAANKA IYO QORISTA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DAWLADDA.

Imtixaan kasta ama shaqosiin kasta oo ku saabsan shaqaale loo qorayo Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Dawladda, waxaa maamulaya Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka ah.

## QODOBKA 14-AAD
## SHAQAALAHA LOOGA BAAHDO GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

Habka Shaqoqorista shaqaalaha looga baahdo Gobollada iyo Degmooyinka oo aysan ku jirin kuwa aan aqoon iyo shahaado toona looga baahnayn waxaa loo marayaa sida uu tilmaamayo Qodobka 13-aad ee Sharcigan, waxaana maamulaya Guddiyada Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Heer Gobol iyo Heer Degmo ama wakiilladooda..

## QODOBKA 15-AAD
## CIQAABTA

(1) Hay'adaha Dawladda waxaa ka reebban inay, si aan shuruucda dalka waafaqsanayn, ku qortaan shaqaale. nooc kasta ha ahaadeene.

(2) Cid kasta oo qorta shaqaale si aan waafaqsanayn sharcigani waxay nutaysaneysaa Anshax marin gaaraysa ilaa shaqo ka saarid.

(3) Shaqaalaha la qoray iyadoon la marinin habka shaqo qorista ee sharcigani tilmaamayo waxaa laga saarayaa shaqada.

## QODOBKA 16-AAD
## ANSIXINTA QORITAANKA SHAQAALAHA

(1) Qoridda Shaqaalaha Dawladda ee Darajooyinka (**A)** iyo (**AY**) waxay ku ansaxaysaa ama ku dhaqan galaysaa Xeer uu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya kaddib marka uu helo Go'aanka Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda iyo talada Ra'iisalwasaaraha.

(2) Qoridda Shaqaalaha Darajooyinkoodu kala yihiin **(F**) iyo (**B**) waxay dhaqan galaysaa marka uu xeer ku soo saaro Ra'iisalwasaaraha Xukuumaddu, kaddib markuu helo go'aanka Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda iyo talada Wasiirka Shaqada iyo

Horumarinta Shaqaalaha.

(3) Qoridda Shaqaalaha Darajooyinkoodu ay kala yihiin (**X**), (**C**), iyo (**D**) ,waxay ku ansaxaysaa saxiixa Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha, isagoo meelmarinaaya Go'aanka Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.

## QODOBKA 17-AAD
## DARAJOOYINKA BILOWGA AH EE JAAMICIYIINTA LAGU QAADANAYO

(1) Sitayaasha Shahaado Jaamicadeed ama wax u dhigma waxaa lagu qorayaa darajada A/8 oo bilow ah.

(2) Aqoonyahannada mushaarkooda waxaa lagu qorayaa Darajada (AY/3) oo bilow ah.

(3) Jaamiciyiinta mushaarkooda waxaa loo kala sarraysiinayaa hadba sida shahaadadooyinkooda, aqoontooda iyo waaya-aragnimadooda shaqo u kala sarreeyaan.

## QODOBKA 18-AAD
## DARAJOOYINKA BILOWGA AH EE FULIYAYAASHA IYO FARSAMAYAQAANNADA

(1)Qofka sita Shahaadada Dugsiga Sare ee Caadiga ah waxaa lagu qorayaa darajada (B10), hadduuse qofku Dugsiga Sare ka dib qaatay tababar aar ahaaneed, ugu yaraan labo sano, waxaa lagu qorayaa Darajada bilowga ah ee (B9). Hase yeeshee haddii labada sano ee tababarka gaar ahaaneed ay u weheliso waaya-aragnimo tababarka ka horeeysay oo aan ka yarayn 3 sano waxaa la gaarsiin karaa Darajada bilowga ah ee (B8).

(2) Qofka sita Shahaadada Dugsiga Sare ee Farsamada ama qaatay tababar gaar ahaneed oo Farsamo ugu yaraan hal sano, ka dib markuu Dugsiga sare ee Caadiga ah dhameystay, waxaa lagu qorayaa Darajada biloowga ah ee (F3).

## QODOBKA 19-AAD

## DARAJOOYINKA BILOOWGA AH EE KARRAANIYAASHA

Qofka sita Shahaadada Dugsiga Dhexe ee Caadiga ah, waxaa lagu qorayaa Darajada (C11), hadduuse Qofku Dugsiga Dhexe ka dib qaatay tababar aqoon gaar ah ugu yaraan laba Sano waxaa lagu qorayaa Darajada (C10).

## QAYBTA IV
## TIJAABADA IYO JOOGTAYNTA SHAQO QORIDDA

## QODABKA 20-AAD
## MUDDADA TIJAABADA SHAQAALAHA CUSUB

(1) Qof kastoo Shaqo Dawladeed loo qoro wuxuu marayaa muddo tijaabo ah oo dhan 3 (saddex) bilood.

(2) Marka uu bilaabayo Shaqada, Madaxa Hay'addu waa inuu qoraal ku ogeysiiyaa muddada qofku tijaabada ku jirayo iyo sharuudaha gaarka ah ee looga baahan yahay qiimeynta wax-qabadkiisa.

## QODOBKA 21-AAD
## SHURUUDAHA SHAQO QORIDDA LAGU RASMIYAYN KARO

(1) Qoridda Shaqaalaha cusub waxaa la rasmiyayn karaa:-

   (b) Markay dhameeystaan muddada tijaabada.

   (t) Kana soo baxaan Sharuudaha kale ee Madaxa Hay'addiisu qoraalka ku ogeysiiyay sida lagu tilmaamay xubinta 2-aad ee qod. 20-aad ee sharcigan.

(2) Markay muddada tijaabada ahi u dhamaato, qofka tijaabada dhammaystay waxaa lagu rasmiyayn karaa ama shaqada looga eryi karaa go'aanka Guddiga Dallacaadaha, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee Hay'addiisa.

## QODOBKA 22-AAD
## SHAQO KA SAARIDDA QOFKA TIJAABADA KU JIRA

(1) Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee Hay'addu waxay shaqada ka eryi karaan shaqaalaha tijaabada ugu jiray, kahor dhammaadka muddada tijaabada, haddii ay u sugnaato in wax-qabadkiisu liito, horumar shaqobarashona uusan samaynaynin. Qofka shaqada sidaas looga saaray ma yeelanayo wax liiltir ah.

(2) Hay'addu waa inay go'aanka Guddigeeda Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee xubinta hore ku tilmaaman ogeysiis ka siisaa Guddia Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda iyo Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha.

## QAYBTA V
## QODOBKA 23-AAD
## WAAJIBAADKA

Qofka shaqaalaha ahi waa:-

(1) In uu waqtigiisa iyo wax-qabadkiisaba ku jeediyaa siduu uga soo bixi lahaa waajibaadka iyo xilka jagadiisa ka saaran iyo hawlaha la xiriira ee Madaxda Hay'addu u xil saartay.
(2) Inuu ka shaqeeyo meesha uu u diro Madaxa Hay'addu.
(3) Inuu inta karaankiisa ah waxba ka hakranin hawsha loo xil saaray isagoo u hoggaansamaya Qodobbada Sharcigaan, nidaamka la dejiyay ee danta guud saameeya.
(4) Inuu ixtiraamo Xeerarka khuseeya Shaqada.
(5) Inuu u aqoonsado inay sir yihiin wararka Shaqada awgeed ku soo gaarey.
(6) Inuusan ka daahin saacadda shaqada isla markaasna uu dhawro waqtiga.
(7) Inuu maqlo ixtiraamana madaxda ka sarraysa.
(8) Inuu xilkiisa iyo shaqadiisa u guto si hufan oo kalsooni ku abuuri karta bulshada (public) uu u adeegayo
.(9) Inuu xushmad iyo furfurnaan u muujiyo dadweynaha uu u adeegaayo isla markaasna ixtiraam iyo wadashaqayn buuxda la yeesho shaqaalaha ay wada shaqeeyaan.
(10) Inuu si joogto ah u ilaaliyo nadaafaddiisa qof ahaaneed isla markaasna shaqadiisa ku yimaado lebbis asturaad leh oo aan ka hor imanaynin anshaha suuban ee Ummadda Soomaaliyeed.
(11) Inuu si xilkasnima ah u dhawro una xannaaneeyo Hantida Dawladda.
(12) In uu iska ilaaliyo wixii shaqadiisa dhaawac gaadhsiin kara.

## QODOBKA 24-AAD
## WAXYAABAHA KA REEBBAN QOFKA SHAQAALAHA AH.

(1) Qofka shaqaalaha ah waxaa ka reebban:-

(b) Inuu ku kaco fal lid ku ah Mabaadi'da caamka ah ee Shaqada, Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda iyo Shuruucda kale ee Dalka.

(t) Inuuu u isticmaalo adeegyada Qalabka iyo Waqtiga Shaqada dano Siyaasadeed oo ka baxsan danaha Shaqada iyo Shaqaalaha.

(j) In uu isku mar wada qabto laba jago iyagoo aan si Sharci ah loogu oggolaan.

(x) Inuu arrimihiisa khaaska ah u maamulo si u keeni karta inuu caadiyan deynlow noqdo.

(kh) Inuu ka tago ama ka maqnaado Shaqadiisa isagoon oggolaansho ka haysan Madaxdiisa.

(d) In uu Xil ka qabto Xisbi Siyaasadeed inta uu hayo shaqada Dawladda.

(2) Qofka Shaqaalaha ahi waa inuusan ku kicin wax kasta oo keeni kara kala Qaybsanaan Shaqaalaha dhexdooda ah.

## QODOBKA 25-AAD
## DHAAR

Qof kasta ee Shaqaale Dawladeed ah marka uu Shaqada billaabayo wuxuu marayaa dhaarta soo socota:- Isagoo lagu dhaarinayo Madaxda Hay'adda horteeda :
(**Waxaa igu wallaahi ah, Igu billaahi ah Igu tallahi ah in aan u hoggaansamayo Dastuurka iyo Sharciyada Dalka, in aan hirgalinayo Awaamiirta Dawladda, anigoo hawsha la ii xilsaaray u gudanaya sida Sharcigu farayo anigoo muujinaya Dadaal, Xilkasnimo, Eex-la'aan, Dhawrayana sirta Dawladda kuna dadaalaya inaan dhawro Nabagalyada, Sharafta iyo jiritaanka Qaranka).**

**QODOBKA 26-AAD**
**WAQTIGA SHAQADA**

Saacadaha Shaqada Dawladdu Maalintii waa **8** (siddeed) **saacadood, toddobaadkiina 48 saacadood.**

**QODOBKA 27-AAD**
**MAGDHAWGA KHASAARAHA AY KEENAAN SHAQAALUHU**

(1) Qofka Shaqaalaha ahi waa inuu magdhaw Dawladda ka siiyaa wixii khasaare ah oo ka dhasha isagoo waajib gudan waayay, dhibaatooyinka ka dhasha ku xadgudubka qodobbada 23-aad iyo 24-aad ee sharcigan.

(2) Haddii ay dhacdo in falka ama wax qabasho la'aanta qofka shaqaalaha ahi. ha u qasdiyo ama hawl yaraysasho ha ka ahaatee, ay dhibaato uga timaaddo dhinacyo kale, Hay'adiisa ayaa bixinaysa wixii magdhaw ah ee uu yeesho dhinaca saddexaad ee dhibaatadu soo gaartay. Hase yeeshee, Hay'addu waxay markeeda xaq u leedahay inay shaqaalaha dhibaatada soo jiiday dib ula xisaabtanto.

**QODOBKA 28-AAD**
**AMARKA MADAXDA OO AAN SHARCIGA WAAFAQSANAYN**

(1) Marka Qofka Shaqaalaha ahi ka helo Madaxa Hay'adda amar shaqo oo aan sharcigan waafaqsanayn, waxaa laga doonayaa in uu Madaxa dareensiiyo sida ay la tahay isagoo caddeynaya asbaabaha uu amarka sharcidarro ugu tilmaamayo. Haddii amarka la adkeeyo iyadoo qoraal ahaan loo siinayo qofka shaqaalaha ah waa in uu amarka shaqo fuliyo. Amarkaasi waa inuu noqdaa mid shaqada Hay'adda la xiriira, mana noqon karo mid uu qofka madaxa ahi uga dan leeyahay inay ugu fusho dan gaar ahaaneed ama Qaranka ama cid kale lagu waxyeellaynaayo, amarkaasoo ay markaas tahay inuu qofka shaqaalaha ahi fulintiisa diido isla markaasna, haddii ay la noqoto, meelaha ku habboon warbixin ka siiyo.

(2) Haddii uu amarka shaqo ee la siiyay uu cawaaqib xun keeno waxaa falkaas mas'uul ka noqonaya Madaxa amarka baxiyay.

## QODOBKA 29-AAD
## DEYN DAWLADDU KU LEEDAHAY SHAQAALE

Haddii ay Dawladdu qof Shaqaale ah deyn ku yeelato, sabab kasta ha ku timaaddee, waxaa lacagta lagu leeyahay laga goyn karaa Mushaarkiisa iyadoo bil walba laga goynayo wax aan ka badneyn afartii meelba hal meel Mushaarkiisa bisha. Hadduuse qofku shaqada ka baxaayo sabab kasta ha ku timaaddee lacagta lagu leeyahay oo dhan waxaa laga gooynayaa lacagta uu Dawladda xaqa ugu yeesho.

## QAYBTA VI
## FASAXYADA
## QODOBKA 30-AAD
## FASAXA TODOBAADKA IYO CIIDAHA

(1) Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin todobaadkiiba hal maalin oo nasasho ah oo sida caadiga ah ku began maalinta Jimcaha.

(2) Shaqaaluhu waxaa kale oo ay xaq u leeyihiin nasasho ah maalmaha Ciidaha ah ee Dawladdu Aqoonsan tahay. Haddii ay maalinta ciidda ahi ku soo aaddo (beeganto) maalinta nasashada ee toddobaadka waxaa loo rarayaa maalinta xigta.

## QODOBKA 31-AAD
## FASAXA SANNADKA

(1) Qofka shaqaalaha ahi wuxuu xaq u leeyahay **30 casho** oo fasax ah Sannadkiiba kuna habaysan maalmaha shaqada (30 working days), iyadoo uu mushaarkiisu u soconaayo.

(2) Qofka shaqaalaha ah waxaa caadiyan fasax-sannadeedkiisa la siiyaa sannad kasta dhammaadkiisa.
.

(3) Madaxda Hay’addu waa in ay qorsheeyaan habkii fasaxa loo bixin lahaa iyagoo tixgalinaya danta Shaqada iyo Shaqaalahaba.

(4) Haddii ay Dawladdu dan Qaran awgeed u joojiso fasaxyada, waxaa qofka shaqaalaha ahi xaq u leeyahay in fasaxiisa loo kaydiyo muddo 3 sano ah, isagoo weydiisan kara in dib laga siiyo ama in lacag loogu beddelo.

## QODOBKA 32-AAD
## FASAXA LACAG LA'AANTA AH

(1) Qofka Shaqaalaha ah waxaa la siin karaa fasax lacag la'aan ah oo gaari kara ilaa 4 bilood saddexdii sano gudahooda.

(2) Fasaxa lacag la'aanta ah waxaa oggolaan kara Hay'adda uu qofku ka tirsan yahay, iyadoo warqadda fasaxa nuqul ka siinaysa Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha iyo Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka ah.

## QODOBKA 33-AAD
## FASAXA DHALMADA IYO NAASNUUJINTA

(1) Haweyda shaqaalaha ahi, ka sokow fasaxyada lagu tilmaamay Qodobbada 30, 31, 32, 34 iyo 35 e sharcigan, waxay xaq u leedahay fasax dhalmo oo gaarayo 4 bilood oo mushaar leh, shardina waxaa ah inay haweenaydu keento caddayn rasmi ah.

(2) Haweeneyda shaqaalaha ah ee xaamilalda ahi waxay fasaxeeda dhalmada ee xubinta hore ku xusan u qaadanaysaa sida hoos ku tilmaaman:

(b) 2 bilood waxay qaadanaysaa dhalmada ka hor;
(t) 2 biloodna waxay qaadanaysaa dhalmada kaddib.

(3) Marka gabadha ummusha ahi dib ugu soo laabato shaqadeedii caadiga ahayd, waxay xaq u leedahay fasax 2 (labo) ssacadood oo naasnuujin ah maalin kasta, wuxuuna fasaxaasi u soconayaa muddo hal sano ah, laga bilaabo maalinta ay shaqada dib ugu soo laabatay.

(4) Haweeneyda Shaqaalaha ahi fasaxeeda caadi ah xaq bay u leedahay sannadka ay qaadato fasaxyadeeda dhalmada iyo naasnuujinta.

## QODOBKA 34-AAD
## FASAXA BUKAANKA

(1) Fasaxa Bukaanka waxaa oggolaanaya Hay'adda uu ka shaqeynayo Bukaanku, ka dib marka ay hesho Caddayn takhatar Dawladeed. Haddii uu fasaxa Bukaanka la siinayo ay mudadiisu ka badan tahay 30 (soddon) maalmood sannad gudihiis, waa in uu caddaynta ka keenaa Guddi Takhaatiir oo ay magacawdo Wasaaradda Caafimaadku.

(2) Waxaa Qofka Bukaanka ah la siinayaa Mushaar buuxa Lixda bilood ee ugu horreeya Fasaxiisa Bukaan. Wixii lix bilood oo xirrir ah ka badnaada waxaa la siinayaa Mushaar badh ah, hase yeeshee, haddii ay jirradiisa ama dhaawaciisa ay sabab u tahay shaqadii dawladda ee uu hayay,

waxaa la siinayaa mushaarkiisa oo dhan (aan waxba laga goynin) ilaa ay muddada fasaxiisa bukaan ka dhammaanayso.

## QODOBKA 35-AAD
## FASAXA WAXBARASHADA

(1) Marka ay Dawladdu qof shaqaale ah u dirsato waxbarasho ama tababar meheradeed, Dalka gudahiisa ama dibaddiisa, waxaa qofka shaqaalaha la siinayaa fasax goynta muddadiisa loo raacayo habraaca soo socda:

(b) Haddii ay waxbarashada qofka la siiyay gaarsiisan tahay heer Jaamacadeed ama wax u dhigma, waxaa muddada fasaxa goynaysa Wasaaradda Tacliinta Sare iyadoo kala tashanaysa Hay'adda uu qofku ka tirsan yahay.

(t) Muddada uu qaadanaayo tababar-meheradeedka qofka shaqaalaha ah la siiyay ee ka hooseeya heer jaamacadeed waxaa goynaysa Hay'adda uu ka tirsan yahay oo la tashanaysa hay'adda tababarka bixinaysa.

(j) Haddii qofka shaqaalaha ahi uu iskiis u helo waxbarasho ama tababar gaar ahaaneed oo aysan Hay'adiisu u fidin, waxaa loo oggolaanayaa fasax lacag la'aan ah oo ku eg muddada waxbarashadiisa, haddii ay waxbarashadaas ama tababarkaas yahay mid ay hay'addu u baahan tahay.

(2) Qofka shaqaalaha ah ee ay dawladdu u fidiso Deeq Waxbarasho waxaa laga saxiixayaa Ballanqaad Qoraal ah oo uu ku caddeynayo in uu Dawladda u shaqeynaayo muddo aan ka yarayn 3 sannadood, laga bilaabo marka uu waxbarashadiisa soo dhammaysto.

## QODOBKA 36-AAD
## DIB ULA NOQOSHADA FASAXYADA

(1) Madaxa Hay'addu, haddii shaqo awgeed loogu baahdo, wuxuu dib ugu yeeri karaa shaqaalaha ku jira fasaxayada ku xusan qodobbada 30 iyo 31.

(2) Shaqaalaha loo yeeray waa in ay goobta shaqadooda ku yimaadaan waqtiga loo qabtay.

(3) Fasaxa qofka shaqaalaha ah laga soo celiyay waa in dib loo siiyaa ama lacag loogu beddelaa.

## QAYBTA VII
## DALLACAAD, DARAJO DHIMID, ERGIN, BADDELAAD IYO SHAQO DIBADEED
## QODOBKA 37-AAD
## DALLACAAD SHAQAALE

(1) Dallacaadi waa u gudbinta qofka shaqaalaha ah loo gudbiyo heer ama darajo ka sarraysa heerkiisii ama darajadisii hore, waxayna u kala baxdaa mid caadi ah iyo mid abaalmarin gaar ahaaneed (**special merit**).

(2) Dallacaad jago waxaa la samayn karaa marka jagadaasi bannaanaato.

(3) Qofka Shaqaalaha ah waxaa dallacaad loo tixgalin karaa marka uu ku sugnaado darajada uu joogo muddo ku siman labo sano.

(4) Halkii sano ee qofka shaqaalaha ahi ee ku jira tababar shaqadiisa la xiriirta waxaa loo aqoonsanayaa laba sano oo shaqo ah.

(5) Qofka lama dallacsiin karo hal darajo wax ka badan markiiba. Haddii qofka lagu magacaabo jago ka sarraysa darajadiisa wuxuu ku mushaar qaadanayaa isla darajadiisii hore, isagoo xaq u yeelanayo wixii gunnooyin ah ee Jagada lagu magacaabay leedahay.

## QODOBKA 38-AAD
## GUDDIGA DALLACAADDA, ABAALMARINTA IYO ANSHAXA EE HAY'ADDA

(1) Hay'ad kasta waxa ay yeelanaysaa Guddi u xilsaaran Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa Shaqaalaha Hay'adda, isagoo wakiil ka ah Guddiga Qaranka ee shaqaalaha Rayidka, kana kooban:-

(b) Agaasimaha Guud ------------------------------------------- Guddoomiye.
(t) AgaasimayaashaWaaxyaha------------------------------------ Xubno
(j) Laba Xubnood oo ka tirsan Guddiga Shaqaalaha ……….. Xubno
(x) Haddii aysan Xubnaha kor ku xusan haween ku jirin, waxaa Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa lagu soo kordhinayaa ugu yaraan hal haweenay oo ka tirsan Hay'addaas.

(2) Markay Hay'addu soo jeediso dallacaad shaqaale, waxaa la hor dhigayaa Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee Hay'adda. Guddigu, markuu si qota dheer arrinta u baaro tixgaliyana Warbixin-sannadeedka iyo taariikh nololeedka shaqaalaha dallacaadda loo

soo jeediyay iyo sharuudaha dallacaadda la xiriira, wuxuu taladiisa u gudbinayaa Madaxa Hay'adda.

(3) Madaxa Hay'addu, marka uu arko talada Guddiga, tixgalinta ay mudan tahayna siiyo, haddii uu garowsado taladaas, waxaa uu soo-jeedinta u gudbinayaa Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka,isagoo nuqul ka siinaaya Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha.

(4) Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladdu, haddii uu waafaqo dallacaadda la soo jeediyay, wuxuu go'aankiisa u gudbinayaa hadba masuulka ansaxinteeda iska leh (soo saaridda dekretada), sida ku cad qodobka 16-aad ee sharcigan.

(5) Ka sokow habka Dallacaadda kor lagu soo sheegay, Madaxweynaha iyo Ra'iisalwasaaruhu waxay dallacaad gaar ahaaneed (**special merit**) u fidin karaan Shaqaale Dawladeed markay ugu muuqato in ay mutaysteen..

## QODOBKA 39-AAD
## ANSIXINTA DALLACAADAHA

(1) Ansixinta Dallacaadaha shaqaalaha ee heerarka kala duwan waxaa loo raacayaa Qodobka 16-aad ee Sharcigan.

## QODOBKA 40-AAD
## DARAJO DHIMID

(1) Darajo dhimid waa qof shaqaale ah oo dib loogu celiyo darajo ka hoosaysa Darajadii uu joogay ama ku meelaysnaa.

(2) Ansixinta darajo-dhimidda shaqaalaha heerkoodu kala duwan yahay, waxaa loo raacayaa habraaca ku tilmaaman qodobka 16-aad ee sharcigan.

## QODOBKA 41-AAD
## ERGIN SHAQAALE

(1) Ergintu waa wareejin ku-meel-gaar ah oo shaqaale lagu wareejinayo:-
   - (b) Hay'ad Dawladeed.
   - (t) Dawlad Hoose.
   - (j) Hay'ad Dawladdu qayb ku leedahay.
   - (x) Dawlad kale.
   - (kh) Hay'ad Caalami ah.

(2) Hawsha Shaqaalaha Erginta ku maqan waxaa loo xisaabayaa Hawl Dawladeed, isagoo Gunnadiisa ka qaadanaya Hay'addii uu ka tirsanaa, haddii aysan labada hay'adood si kale ugu heshiinin.

## QODOBKA 42-AAD
## BEDDEL SHAQAALE

(1) Baddalaaddu waa wareejinta shaqaale laga wareejinayo Hay'ad loona wareejinayo Hay'ad kale.

(2) Qofka Shaqaale ah waxaa hay'addiisa looga baddali karaa:-
- (b) Hadduu dheeraad ku yahay.
- (t) Hadduu Hay'ad kale ku waxtar roon yahay iyadoo xirfaddiisa la tixgalinayo.
- (j) Hadday maslaxadda Qaranku ay ku jirto, ama daryeelkiisu.

(3) Baddalaaddu shaqaalaha mushaarkiisa waxna ku kordhin mayso, waxna ka dhimi mayso hase yeeshee hadday noqoto lagama maarmaan in mushaaradiisa wax ka dhinmaan waa in Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha dib u qiimeyso iyadoo tixgalinaysa tacliintiisa, aqoontiisa guud iyo waayo-aragnimadiisa.

(4) Baddalka qofka shaqaalaha ahi wuxuu hirgali karaa marka ay isla oggaalaadaan Madaxa Hay'adda qofka laga baddalayo iyo Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha.

(5) Ansixinta baddalka shaqaalaha ee heerarka kala duwan waxaa loo raacayaa habka ku tilmaaman Qodobka 16-aad ee Sharcigan.

## QODOBKA 43-AAD
## SHAQAALAHA SHAQO DIBADDA AH KU MAQAN

Shaqaalaha dowladeed ee shaqo qaran dibadda loogu diro haddii ay dhibaato hawshaas loo diray uga timaaddo dhibaatadaas awgeedna ay u suurtoobi weydo inuu ku soo noqdo dalka, xaaskiisa ama caruurtiisa,, ama ciddii kale ee xaq ku leh, waxaa la`siinayaa mushaharkii uu qaadan jiray ilaa iyo inta uu uga soo noqon karayo dalka ama la hubinayo xaaladdiisu sida ay ku sugan tahay.

**QODOBKA 44-AAD**
**KALA MUDNAANTA SHAQAALAHA ISKU DARAJADA AH.**

Kala mudnaanta Shaqaalaha isku Darajada ah waxaa loo fiirinayaa kala mudnaanshahooda sida ay shaqada ama darajada ugu soo kala horreeyeen.

**QAYBTA VIII**
**ANSHAXA**
**QODOBKA 45-AAD**
**TALLAABOOYINKA ANSHAXMARINTA SHAQAALAHA**

(1) Tallaabooyinka Anshaxeed ee lagu qaadi karo Shaqaalaha waxay noqon karaan:-
- (b) Canaan afeed.
- (t) Canaan qoran.
- (j) Ganaax aan ka badnayn Mushaarkiisa 7 (toddoba) casho.
- (x) Mushahaarkiisa oo muddo aan bil ka badnayn laga gooyo, iyadoo loo raacayo Habka ku qoran Qodobka 28-aad ee sharcigan.
- (kh) Shaqo iyo Mushahar ka joojin aan ka badnayn 3 (saddex) bilood, muddadaasoo aan saamayn ku yeelanaynin hawlgabkiisa iyo liiltirkiisa.
- (d) Ka daahin dallacaad.
- (r) Mushahaar ka dhimid gaari karta Saddex dalool oo hal meel (1/3).
- (s) Hoos u dhigid Darajo.
- (sh) Shaqo ka saarid.

(2) Tallaabooyinka anshax ee lagu sheegay Xarafaha (b) ilaa (j) ee Xubinta hore ee Qodobkan waxaa lagu mutaysan karaa:-
- (b) Shaqo dayicid ama Hawl qabasho naaqusta.
- (t) Amar diido loo qasday.
- (j) Ku xad-gudub Qodobbada 23 iyo 24 ee Sharcigan.
- (x) Dhaqan xumo keenta Shaqo joogsata ama qas gala Shaqada.
- (kh) Shaqo ka maqnaan cudurdaar la'aan.
- (c) Wax-ka-qabasho la'aan Shaqaalaha hoose oo ku xadgudba nidaamka shaqada.

(3) Tallabooyinka anshax lagu sheegay Xarfaha (x) ilaa (sh) ee Xubinta hore, haddii aysan noqonin kuwo loo gudbiyay maxkamad, waxaa lagu mutaysan karaa:-
- (b) Ku xad-gudub awoodeed.
- (t) Ku xad-gudub waajibaad Xafiis oo dhib u soo jiida Hay'ad Dawladeed ama Dad gaar ah.

(j) Ku tagrifal Xoolo Dadweyne oo Qofka Shaqaalaha ah lagu aaminay.
(x) Amar diido weyn.
(kh) Dhawris la’aan sirta Dawladda.
(d) Ka faa’iidaysi awoodda Jagada si dan shaqsi ah loo gaaro.

(4) Tallabooyinka anshax ee kor lagu sheegay waa la kordhin karaa ama waa la dhimi karaa marka ay jiraan duruufo culaysin kara ama fududayn kara.

## QODOBKA 46-AAD
## QAADIDDA TALLAABOOYINKA ANSHAXA

(1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Ra’iisalwasaaraha Xukuumadda Federaalka KMG. Ama ciddii ay wakiishaan waxay awood u leeyihiin in ay:-
(b) Tallaabooyinka Anshaxa ee ku xusan Xubinta 1aad ee Qod. 43-aad ku Qaadaan Shaqaalaha Xafiisyada Madaxweynaha iyo kan Ra’iisal-Wasaaraha iyagoo dhagaystay talada Guddiga Dallacaadaha, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee Xafiisyadooda.
(t) Tallabooyinka anshaxa ee ku xusan Xarfaha (j) ilaa (sh) ee Xubinta 1-aad ee Qodobka 43-aad Golaha Wasiirradu waxay ku qaadayaan Agaasimayaasha Guud iyo Shaqaalaha la midka ah ee Hay’adaha Dawladda marka ay dhagaystaan talada Guddi ay magacaabeen iyo eedeeynta hay’addii uu ka tirsanaa, waxaana lagu ansixinayaa xeer Madaxwene.
(j) Tallaabooyinka anshaxeed ee ku xusan xarfaha (x), (r), (s), iyo (sh), ee Xubinta 1-aad ee Qod. 43-aad ee Sharcigan Golaha Wasiirradu waxay ku qaadayaan Shaqaalaha Dawladda markay dhagaystaan talada Wasiirka hay’addaas iyo Go’aanka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda, waxaana lagu soo saarayaa Xeer Ra’iisalwasaare.

(2) Madaxa Hay’addu waxa uu awood u leeyahay inuu:-
(b) Tallaabooyinka anshaxa ee ku xusan Xarfaha (j), (kh) iyo (d) ee Xubinta 1-aad ee Qod.43-aad ee Sharcigan in uu ku qaado Shaqaalaha Hay’adda isagoo dhageystay talada Guddiga Dallacaadaha, Abaalmarinta. iyo Anshaxa ee hay’adda, iyo Go’aanka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.
(t) Tallaabooyinka anshaxa oo ku xusan Xarfaha (b) iyo (t) ee Xubinta 1-aad ee Qod. 43-aad ee Sharcigan in uu ku qaado Agaasimaha Guud iyo Shaqaalaha la midka ah ee Hay’adaha hoos yimaada.

(j) Uga jeediyo ra'yigiisa Golaha Wasiirrada tallaabooyinka anshaxeed ee ku xusan Xarfaha (x), (r), (s) iyo (sh) ee Shaqaalaha Hay'addiisa marka uu dhagaysto garawsadana talada Guddiga Dallacaadaha Abaalmarinta iyo Anshaxa. ee Ha'yadda.

(3) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Dawladdu waxuu awood u leeyahay inuu tallaabooyinka anshax ee ku xusan Xarfaha (b) iyo (t) ee Xubinta 1-aad ee Qod. 43-aad ee Sharcigan ku qaado Shaqaalaha Hay'addiisa marka uu dhagaysto talada Agaasimaha Waaxda qofku ka tirsan yahay., isagoo qoraal ku wargelinaaya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.

(4) Guddiga Dallaacadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee Gobolladu waxaa uu ka kooban yahay:-

(b) Guddoomiyaha Gobolka ------------------------------------ Guddoomiye.
(t) Guddoomiye-Ku-Xigeenka 1-aad ee Gobolka ------------ Xoghaye.
(j) Wakiil ka tirsan Wasaarada Shaqada iyo H. Shaqaalaha ----Xubin.
Meesha uusan jooginna G/Ku-Xigeenka 2-aad ee Gobolka.
(x) Wakiil ka socda Xiriirka Guud ee Ur. Shaqaalaha ee Gobolka - Xubin

(5) Guddiga Dallaacadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee Gobolladu wuxuu, dhinaca Anshaxa Shaqaalaha Dawladda, awood u leeyahay inuu:-

(b) Tallaabooyinka Anshaxeed ee ku xusan Xarfaha (b) iyo (t) ee Xubinta 1-aad ee Qod. 43-aad ee Sharcigan ku qaado Shaqaalaha Gobollada.
(t) In ay u gudbiyaan Wasiirka Hay'adda Tallaabooyinka Anshaxeed ee ku xusan Xarfaha (j) ilaa (sh) ee Xubinta 1-aad ee Qod. 43-aad ee Sharcigan.
(j) Falalka Anshaxeed ee ka dhaca Degmooyinka Magaalamadaxda Gobolka ka baxsan waxay u wakiilan karaan guddi hoosaadyo Degmooyinka ka tirsan oo talo Guddiga uga soo jeediya.

(6) Wasiirku markuu ka fiirsado talada Guddiga Gobolka garawsadana waa inuu ka qaadaa tallaabooyinka ku xusan Xarfaha (b) iyo (j) ee Xubinta 2-aad ee Qodobkan.

(1) Tallaabooyinka anshaxeed ee ku xusan Xarfaha (x), (r), (s) iyo (sh) ee Xubinta 1-aad ee Qodobka 43-aad ee Sharcigan waxaa lagu hirgalinayaa Xeer iyadoo loo raacayo habraaca ku tilmaaman qodobka 16-aad ee sharcigan.

## QOBODKA 47-AAD
## HABKA QAADISTA DACWADAHA

(1) Dacwad kastoo anshaxeed waa in loo gudbiyaa guddiga qaadisteeda awoodda u leh, iyadoo qoran muddo bil ah gudaheed laga bilaabo maalinta falku dhacay ama la ogaaday haddii kale wax ka soo qaad ma leh.

(2) Guddigu wuxuu qoraal ku ogaysiinayaa dacweysanaha taariikhda dacwadda la galayo, isagoo gaarsiinaya nuqul dacwadda loo haysto ugu yaraan 24 Saac ka hor intaan dooddu furmin.
Nuqulkaas waa inay ka muuqataa arrinta qofka lagu soo eedeeyay.

(3) Guddigu waa inuu:-

(b) Qaadaa wixii caddayn ah oo eedaynta taageeraysa ka dibna waa inuu qaadaa wixii caddeyn ah oo uu la yimaado qofka dacwadda loo haysto kaasoo xaq u leh goobjoog in uu ahaado marka dacwadda iyo caddayntaba la qaadayo, si buuxdana isku daafaco, iyadoo hay'addu u fududaynayso helitaanka wixii caddaymo ah ee uu difaaciisa uga baahdo.

(t) Hadal qoraalka Guddigu waa inuu koobaa wixii Caddeyn ah oo la qaaday iyo sidii dooddu u dhacday.

(j) Go'aanka Guddigu waa inuu Qoraal noqdaa waana inay saxiixaan dhammaan Xubnaha Guddiga.

(x) Guddiga Anshaxu waa inuu galaa Dacwadda la hor keenay muuddo 15 maalmood gudahood ah si dhaqso lehna u dhammeeyaa.

(kh) Go'aanka ka soo baxa Guddiga Anshaxa waa in nuqul laga siiyaa Qofka arrintu khusayso, galkiisana nuqul la galiyaa, nuqullo kalena loo diro Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha,iyo Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidaka.

## QODOBKA 48-AAD
## SHAQO KA JOOJIN

(1) Madaxa Hay'addu, hadduu u arko dan guud, wuxuu shaqada iyo mushaar-kaba ka joojin karaa Shaqaalaha lagu soo eedeeyay tallaabo anshaxeed ama fal dembiyeed.

(2) Madaxa Hay'addu wuxuu kaloo qofka dembiga iyo anshaxa lagu soo eedeeyay shaqada iyo mushaarkaba ka joojin karaa:-

(b) Haddii Maxkamadi waaran u gooyso.

(t) Haddii ay caddaato in qofka dembiga lagu eedeeyay uu ku noqnoqday.

(3) Muddada Shaqo hakintu socoto qofka mushaar waa la siin karaa **il**a inta uu kaga dhacaayo xukun maxamadeed oo kama dambays ah.

## QODOBKA 49-AAD
## JOOJIN DHACDO ANSHAXEED ILAA LAGA DHAMAYNAYO DACWO CIQAABEED

Haddii Dacwad Ciqaabeed oo liddi ku ah Qof Shaqaale ah ay Maxkamad ka socoto, isla Dambigaas Dacwad Anshaxeed lagama furi karo ilaa Dacwadu Maxkamadda ka soo dhammaato.

Haddii Dacwadda Anshaxeed mar hore la bilaabay waa la joojinayaa ilaa laga hubsado siday ku dhammaato Dacwadda Ciqaabtu.

## QODOBKA 50-AAD
## KU QAADID DACWO ANSHAXEED SHAQAALAHA LAGU WAAYO DAMBI CIQAABEED

In kastoo shaqaalaha si kama dambeys ah dambi ciqaab ah loogu waayo, waxaa haddana lagu qaadi karaa dacwad anshaxeed haddii dacwadda ciqaabta intay socotay laga war helay caddeymo waajib ka dhigayo in tallaabo Anshax ah laga qaado.

## QAYBTA IX
## DHAMMAADKA XIRIIRKA SHAQADA
## QODOBKA 51-AAD
## SHAQO KA TAGIS

(1) Qofka ah Shaqaale Dawladeed oo joogto ah wuxuu xaq u leeyahay inuu hay'addiisa qoraal kaga codsado shaqo ka tagis, isagoo siinaya hay'adda wargelin laba bilood ah intaysan muddadiisa shaqo dhammaanin.

(2) Hay'addu waa inay codsiga shaqo ka tagista ee Xubinta Kowaad ku qoran ku oggolaataa Muddo Bil Gudeheed ah, laga bilaabo Taariikhda ay arjiga heshay, isla markaasna waa in ay ku diyaarsataa ciddii xilka kala wareegi lahayd.

(4) Ansixinta Shaqo-ka-tagista shaqaalaha heerkoodu kala duwan yahay waxaa loo raacayaa habraaca ku tilmaaman qodobka 16-aad ee sharcigan.

## QODOBKA 52-AAD
## SHAQO KU CELIN

(1) Shaqaalaha ku sugnaada xaaladaha ku tilmaaman Xarafyada (b), (t) iyo (j) ee Qodobkan waxaa lagu celin karaa Shaqada ay Hay'adda ka hayn jireen Haddii:-

(b) Shaqadooda loo baahan yahay.
(t) Jago ku habboon bannaan tahay.
(j) Muddada ay Shaqada horey u hayn jireen muujiyeen dadaal, karti iyo daacadnimo iyadoo laga shidaal qaadanayo qof kasta galkiisa.

(2) Sharuudaha mid kasta u gaarka ahi ay u dhan yihiin kuwaasoo ah.

(b)Qofka Shaqaalaha ah ee lagu xiray dambi ka reebaya shaqda dawladda.

(t) Haddii uu qorniin kaaga codsado Hay'addii uu ka tirsanaan jiray Shaqo ku celin muddo Laba bilood gudahood ah marka laga bilaabo Taariikhda Xabsiga laga sii daayay.

(3) Sida ku cad qodabka 52-aad ee sharcigan, qofka shaqada markii hore looga fariisiyay caafimaad-daro awgeed:

(b) Haddii Guddi Takhaatiir Dawladeed ah oo Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha u dirtay soo caddeeyay in Caafimaadkiisu wanaagsan yahay oo uu gaaray heer uu hawshiisa si caadi u gudan karayo.
(t) Hadduu qoraal ku soo codsado Shaqo ku celin muddo laba sano gudahood ah marka laga bilaabo Taariikhdii Shaqada laga fariisiyay.

(4) Sida ku cad qodobka 49-aad ee sharcigan, qofka shaqo ka tagis si sharci ah markii hore lagu oggolaaday oo hal sano gudaheed shaqo ku celin soo codsada, marka laga bilaabo taariikhdii shaqo ka tagista laga oggolaaday.

(5) Awoodda go'aan ka gaarista codsiga Shaqo ku celinta waxaa yeelanaya Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa Hay'adda waxaana lagu ansixinayaa Xeerka Madaxweynaha Xeerka Re'iisal-Wasaaraha Ama Xeerka Wasiirka Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha Iyada oo la raacayo Qodobka 16-aad ee sharcigan.

(6) Qofka shaqada lagu celiyaa wuxuu xaq u yeelan karaa mushaar marka uu rasmi ahaan shaqada u bilaabo.

## QODOBKA 53-AAD
## SHAQO KA FADHIISAD DA' AWGEED

(1) Qofka Shaqaalaha ah waxa uu Shaqada ka fadhiisanayaa:
- (b) Marka uu gaaro 65 sano haddii uu Rag yahay.
- (t) Markeey gaarto 60 sano haddii ay Dumar tahay.

(2) Mararka qaarkood Qofka Shaqaalaha ah waxaa loo oggolaan karaa inuu Shaqada ka fadhiisto ka hor intuusan gaarin Da'da kor ku Sheeggan iyadoo la tixgalinayo jiritaanka duruufo gaar ahaaneed.

(3) Haddii qofka shaqaalaha ah ee gaaray da'da shaqo ka fariisiga ee ku xusan xubinta koowaad ee qodobkan loo arko in shaqadiisa loo sii baahan yahay, waxay isaga iyo Hay'addiisu isla oggolaan karaan in uu shaqada dawladda ku sii jiro.

## QODOBKA 54-AAD
## SHAQO KA FADHIISIN CAAFIMAAD DARTIIS

Qofka shaqaalaha ah waxaa shaqada Dawladda looga fariisiin karaa arrimo caafimaad awgood, ka dib markii la helo caddayn Guddiga caafimaadka ee dawladda, isagoo la siinayo wixii uu xaq u yeesho.

## QODOBKA 55-AAD
## SHAQO KA SAARID SABAB ANSHAXEED, XUKUN MAXKAMADEED AMA SHAQO KA MAQNAANSHO MUDDO DHEER CUDUR DAAR LA'AAN

(1) Qofka Shaqaalaha ah waxaa Shaqada looga saari karaa sababaha soo socda:-
- (b) Tallaabo anshaxeed uu ku qaaday Guddi anshax.
- (t) Xukun Maxkamadeed oo kama dambays ah oo ku saabsan ku isticmaalka xafiiska si loo helo macaash sharci darro ah, ama xatooyo xoolo dadweyne, khiyaano, tuugo, dhac ama dembi kaloo qofka ka reebaya inuu qabto shaqo dawladeed inkastoo la cafiyo.

(j) Ka maqnaasho shaqada muddo lix bilood ah cududaar la'aan.

(x) Shaqaalaha shaqa ka saariddiisa qodobkan loo cuskado xaq uma laha fasaxa caadiga ah ee sannadka ugu dembeeya shaqada maadaama aannu u bislaanin fasax.

## QODOBKA 56-AAD
## SHAQO KA SAARID XAQ LA'AAN

(1) Tallaabo anshaxeedyada kale ee sharcigan ku xusan ka sokow, qofka shaqaalaha ah waxa shaqada qaranka lagaga saari karaa xaq la'aan hadday Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee Hay'adda hortiisa kaga
caddaadaan cilladahani:- Hakrasho, googooyin iyo curyaamin shaqada dowladda isagoo tusaale xun u muujinaya shaqaalaha dowladda ah si uu danihiisa gaarka ah u fushado.

(2) Sugnaashaha jiritaanka cilladaha lagu sheegay xubinta 1-aad ee qodobkan waxaa caddayntiisa u xil saaran Guddiga shaqaalaha iyo maamulka hay'adda oo wada jira.

## QAYBTA X
## QAYBTA FARSAMOYAQAANKA
## QODOBKA 57-AAD
## MAAMULKA FARSAMOOYINKA

Shaqaalaha Farsamoyaqaannada ah waxaa loo dejiyay Qaybta Sharcigan oo u gaar ah oo lagu Maamulo Darajooyinkooda iyo, Jagooyinkooda, sida ku cad Lifaaqa 2aad ee Sharcigan.

## QODOBKA 58-AAD
## MAAMULKA FARSAMOYAQAANKA.

(1) Darajooyinka farsamayaqaannada waxay u kala qaybsan yihiin sida soo socota:-
- (b) Aqoonyahan.
- (t) Farsamayaqaan.
- (j) Xirfadle.
- (x) Kaaliye xirfadle.
- (kh) Farsamobarad.

(2) Jago kastaa waxay leedahay darajooyin kala duwan, mushaharo bilow ah

iyo mid ay ku dhammaato.

(3) Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha farsamayaqaannada ayadoo loo tixgelinaayo heerka imtixaanka uu gudbey ama shahaadada farsama ee uu sito, ayaa lagu meelaynayaa darajada ku habboon ee ku xusan lifaaqa 2aad ee sharcigan.

**QODOBKA 59-AAD**
**DALLACAADDA FARSAMOYAQAANNADA**

(1) Farsamoyaqannadu waxay xaq u leeyihiin dallacaad darajo.

(2) Dallacaadda darajada waxa lagu mutaysan karaa:-
- (b) Imtixaan uu qofku ku guulaystay.
- (t) Marka qofku la yimaado shahaado ka sarraysa tii hore uu u sitey (Cambiamento di categoria).

(3) Qofkii muujiyey karti daacadnimo iyo hawlkarnimo dheeraad ah qayb weyna si muuqata uga qaatay horumarka iyo waxsoosaarka dalka waxaa la siin karaa dallacaad gaar ah (Special merit).

(4) Qofka farsamo yaqaanka ah darajada uu joogo lagama dallacasiin karo haddii uusan la iman shuruudaha mid ka mid ah ku cad qodobkan. Qodobkan erayada“ Farsamo yaqaannadu” iyo “Farsamo Yaqaanka” waxaa loola jeedaa shaqaalaha qaybta sharcigani saamaynayo oo dhan.

**QODOBKA 60-AAD**
**IMTIXAANKA QIIMAYNTA HEERKA AQOONTA EE FARSAMOYAQAANNADA & XIRFADLAYAASHA**

(1) Qofka kasta oo ka mid ah shaqaalaha xirfadlaha ah labadii sannaba Mar baa imtixaan laga qaadi karaa, si loo qiimeeyo heerka aqoontiisa.

(2) Qofkii imtixaanka ku guuleeysta hal darajo ayaa sare loo qaadi karaa.

(3) Qofkii imtixaanka galaya, waxa shardi ah in ay madaxdiisu labada sano ee imtixaanka ka horraysa u gartaan in qofkaasi uu istaahilo in imtixaan laga qaado

iyadoo la tixgelinayo sida uu u guto waajibaadkiisa asluubtiisa iyo hawlkarnimadiisa.

## QODOBKA 61-AAD
## HEERKA AQOONTA XIRFADLAHA

(1) Qofka xirfadlaha ah ee doonaya inuu u gudbo farsama yaqaan, waa inuu xirfadda uu u go'doomay u yaqaan teori ahaan iyo baraatika ahaan, isticmaali karaana kutubta iyo naqshadaha farsamadaas la xiriirta.

(2) Xirfadlaha waa inuu ugu yaraan laba sano ku shaqeeyaa darajada koowaad ee xirfadlaha, imtixaanka xirfadana ku guuleystaa, inta uusan u gudbin darajada ka sarraysa midda uu joogo.

(3) Xirfadlaha koowaad (ama sare) ee u dallaca farsamayaqaan, lacagtii uu ku qaadan jirey darajada xirfadlaha waxba ka go'imaayaan, hasa yeeshee jago ahaan wuxuu gelayaa heerka farsamada ee uu imtixaankeeda ku guulaystay.

(4) Xirfadlaha darajada koowaad jooga ee aqoon iyo waayo aragnimo dheer leh, si joogta ahna looga soo qoray warbixin wanaagsan, kana gudbi waayey imtixaankii uu farsamayaqaanka ugu gudbi lahaa, hawshana aan looga maarmin 3 sanaba mar ba heerka mushaharkisa kor loo qaadi karaa ilaa laga gaarsiinayo heerka ugu sarreeya ee xirfadlaha.

## QODOBKA 62-AAD
## FARSAMAYAQAAN SARE EE U GUDBAYA AQOONYAHAN

(1) Farsama yaqaanka sare ee u gudbaya aqoonyahan, lacagtii uu ku qaadan jirey jagada farsamayaqaannimada waxba ka go'imaayaan hase yeeshee, jago ahaan wuxuu gelayaa jagada ugu hoosaysa ee aqoonyahanka.

(2) Farsamayaqaanka sare ee aqoon iyo waayo aragnimo dheer leh, si joogta ahna looga soo qoray warbixin wanaagsan kana gudbi waayey imtixaankii uu ugu gudbi lahaa aqoonyahan hawshana aan looga maarmin 3 sanaba marbaa mushaharkiisa kor loo qaadi karaa ilaa laga gaarsiinayo heerka ugu sarreya ee Aqoonyahan

## QODOBKA 63-AAD

## AQOONYAHANNADA

Aqooyahannada jaamiciga ah musharkooda bilowga ah waxa loo kala sarraysiin karaa hadba sida shahaadadooda iyo aqoontooda waayo aragnimo u kala sarrayso.

## QODOBKA 64-AAD
## SHAHAADADA DUGSIGA DHEXE

Qofka isagoo haysta shahaadada dugsiga dhexe qaatay tababar gaar ah ee farsamo ugu yaraan labo sano wuxuu la mid yahay farsamayaqaanka F. 3.

## QODOBKA 65-AAD
## SHAHAADADA DUGSIGA SARE EE CAADIGA AH

Qofka isgoo haysta shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah qaatay tababar gaar ah ee farsama yaqaan hal sano, ama ka gudbay imtixaanka farsama yaqaanka wuxuu noqonayaa farsamo yaqaanka F. 2.

## QODOBKA 66-AAD
## QORITAANKA FARSAMOBARADKA

(1) Xirfad kasta ama farsamo kasta waxay lahaan kartaa ama loo qori karaa shaqaale farsama barad ah oo tababar ku qaata xirfadda.

(2) Marka tababarka loo qaadanayo qoritaanka farsamo baradka waxa loo raacayaa habka shaqo qorida ee shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahanayn.

(3) Haddii ay miisaaniyaddu oggoshahay hay’addaha dowladda waxay qof kasta oo farsamo barad ah siinayaan gunno gaaraysa lacag shilinka Soomaaliga ah oo u dhiganta **$30 – $40** bishiiba.

(4) Qofka farsamo baradka ahi wuxuu xagga badbaadada shaqaalaha kala mid yahay qofka uu xirfadda ka baranayo.

(5) Marka tababarku u dhammaado haddii hay’adda ay farsamada ka bartaan

ama hay'ad kale ee dowladeed shaqada farsama baradka u baahato waxaa laga qaadi karaa imtixaan u gaar ah kooxda ama kooxaha farsamo baradka ah ee shaqadooda loo baahan yahay

## QODOBKA 67-AAD
## GUDDIGA QARANKA EE FARSAMADA

(1) Si qaybta farsamayaqaanka ee sharcigan si habsami ah loogu hirgeliyo waxa la dhisay Guddiga Qaranka ee Farsamada oo ka kooban wasiirrada wasaaradaha iyo Guddiga soo socda:-

- (b) Wasaaradda Shaqada iyo Hormarinta Shaqaalaha.
- (t) Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka.
- (j) Wasaaradda Warshadaha.
- (x) Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka.
- (kh) Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.
- (d) Wasaaradda Gaashaandhigga.
- (r) Wasaaradda Hawlaha Guud.
- (s) Wasaaradda Kalluunmaysiga.
- (sh) Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.
- (dh) Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

(2) Xoghaynta guddiga qaranka ee farsamada waxaaa ah Wasaaradda Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha.

(3) Wasiirradu waxay socodsiinta hawlaha caadiga ah u wakiilan karaan agaasimayaasha guud ee wasaaradahooda oo uu guddoomiye u noqonaya agaasimaha guud ee wasaaradda shaqada iyo hormarinta shaqaalaha. Waxa kaloo guddigan ka qayb gelaya wakiil ka socda xiriirka guud ee ururka shaqaalaha Soomaaliyeed.

## QODOBKA 68-AAD
## XILKA GUDDIGA QARANKA EE FARSAMADA

(1) Xilka iyo hawsha Guddiga Qaranka ee Farsamada waxay tahay:-

- (b) Inuu dejiyo qorshaha imtixaanka xirfadlayaasha.
- (t) Inuu qiimeeyo shahaadooyinka aqoonyahaynada iyo farsamayaqaanka.
- (j) Inuu ka qaado shaqaalaha xirfadlayaasha ah imtixaan lagu qiimaynayo aqoonta qof kasta ee xirfadle ah.
- (x) Inuu bixiyo shahaado qiimayn xirfadle.

(kh) Inuu dejiyo barnaamijka tababarrada shaqaalaha xirfadlayaasha ah iyadoo lala kaashanayo hirgelinta tababarrada hay'adaha ku shaqada leh.

(2) Guddiga Qaranka waxay kaloo awood u leeyihiin inay magacaabaan Guddi-hoosaadyo oo ka kooban dad farsamoyaqaan ah, si ay imtixaan uga qaadaan dadka xirfadlayaasha ah ee qaybta farsamayaqaanka ee sharcigani tilmaamayo.

## QODOBKA 69-AAD
## DHAQAN GELINTA SHARCIGAN

Shaqaalaha farsamayaqaanka ahi qaybta sharcigan ka sokow waxay u hoggaasamayaan sharciyada shaqaalaha rayidka ee Dawladda.

## QODOBKA 70-AAD
## LIISKA FARSAMADA LA AQOONSAN YAHAY

(1) Magacyada iyo tirada farsamooyinka la aqoonsan yahay waa kuwa ku xusan lifaaqa 3-aad ee sharcigan.

(3) Hadday soo baxaan farsamooyin aan ku xusnayn lifaaqa saddexaad ee sharcigan marka, uu Guddiga Qaaranka ee Farsamadu hubsado jiritaankooda, waxaa lagu kordhin karaa liiska farsamooyinka ee sharcigan ku lifaaqaan.

# QAYBTA XI
# BADBAADADA SHAQAALAHA IYO GUNNOOYINKA
## QODOBKA 71-AAD
## BADBAADADA SHAQAALAHA

Badbaadada shaqaalaha waxaa loo Diyaarin doonaa Sharci gaar ah.

## QODOBKA 72-AAD
## GUNNOOYINKA SHAQAALAHA

Arrimaha ku saabsan gunnooyinka waxaa loo diyaarin doonaa Sharci gaar ah.

# QAYBTA XII
# HAWLGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA

## QODOBKA 73-AAD
## NIDAAM GUUD

(1) Nidaamka guud ee hawlgabka iyo liiltirka waa sida soo socota:

**b)** Hawlgabka la siinayo shaqaalaha si xiriir ah ugu shaqeeyay Dawladda muddo **20** sano ah ama in ka badani waa sidan:

**i) 65%** mushaarka aasaasiga ah hadduu shaqeeyay **20** sano iyo ka kor laakiin aan gaarin **25** sano.

ii) **75%** mushaarka aasaasiga ah hadduu shaqeeyay **25** sano iyo ka kor laakiin aan gaarin **30** sano.

iii**) 85%** mushaarka aasaasiga ah hadduu shaqeeyay **30 sano** iyo ka badan.

**t)** Shaqaalaha aan muddo hawlgab gaarin laakiin si joogta ah u soo hayay shaqada dawladda **10 sano** ama in ka badan, waxaa la siinayaa, markay shaqada ka joogsadaan, xaq liiltir ah oo u dhigma bil mushaarkeeda aasaasiga ah, sannad kasta oo ay shaqeeyeen.

(2) Muddada lagu mutaysanayo hawlgabka ama xaqa ku tilmaaman xubinta 1-aad ee qodobkaan waxaa laga soo bilaabayaa 1-dii April 1950 ama taariikhda qofku shaqada joogtada ah bilaabay hadba tii dambaysay.

Hase yeeshee, hubinta hawlgabka, habka bixintiisa iyo jaangoynta Muddadiisaba waxaa u xilsaaran Guddi gaar ah oo ay xubnihiisa ka mid Yihiin Wasaaradda Maaliyadda & Lacagta, Wasaaradda Shaqada & Horumarinta Shaqaalaha, Bankiga Dhexe iyo Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

(3) Marka sharcigan laga hadlaayo "mushaarka aasaasiga ah" waxaa loola jeedaa mushaarka bileed ee aasaasiga ah ee uu qaadanayay markii shaqadu u dhammaatay qofka iyadoo laga reebayo gunnooyinka oo dhan..

(4) Nidaamka guud ee hawlgabka ee uu sharcigani dhigaayo,hayadaha dawladda xaq looguma yeelan karo wax ka badan hal hawlgab.
Hase yeesheem haddii ay dhacdo in qof shaqaale ahi, kaddib markii uu qaatay hawlgabkiisii, uu dib shaqo dawladeed u bilaabay, waxaa muddada shaqadan dambe loo xisaabinayaa mid aan joogto ahayn wuxuuna xaq u yeelanayaa liiltir u dhigma hadba muddada uu shaqeeyay.

(5) Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawlgab ay geeriyi ku timaaddo, dhaxaltooyadiisu waxay xaq u leedahay hal hawlgab.

(6) Qofka shaqaale ah ee galay hawlgab ma qaban karo shaqo Dawladeed oo rasmi ah.

## QODOBKA 74-AAD
## SHURUUDAHA LAGU WAAYI KARO HAWLGABKA IYO LIILTIRKA

1) Hawlgab ama liiltir waa in aan la siin sarkaalka shaqada looga eryo sababaha soo socda:
    b) Tallaabo anshax.
    t) Xukun maxkamadeed oo aan ka yarayn 3 sano, haddii lagu xukumo dacwo ciqaab ah oo ka dhalatay jagada rasmiga ah oo ka faa'iidaysasho aan sharci ahayn loo isticmaalay, xatooyo xoolo dadweyne,tuugo, khiyaamo, iyo dembi kasta oo ka reebaya qofka shaqaalaha ah inuu qabto shaqo dawladeed.

2) Qofka shaqaalaha ah ee ku sugnaada xaaladaha lagu xusay xarfaha (b) iyo (t) ee xubinta hore,waxaa la siinayaa lacagtii looga gooyay hawlgab ama liiltir.

## QODOBKA 75-AAD
## SHAQO KA RUQSEYSI

(1) Qofka shaqaalaha ah ee iskiis uga ruqseysta shaqada dowladda lama siin karo hawlgab, hadduusan dhammaysan 20 sannadood oo shaqo dawladeed oo xiriir ah. Hase yeeshee waxa la siin karaa liiltir hadduu shaqeeyay 5 sano ama in ka badan oo xiriir ah iyadoo lagu siinayo hal bil mushaarkeed asaasiga ah.sannad kasta oo buuxa oo uu shaqeeyey.

(2) Qofka shaqaalaha ah ee shaqeeyey muddo ka yar 5 sano isla markaana si sharci ah looga oggolaaday shaqo ka tegista wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo lacagtii looga goyn jirey hawlgabka.

## QODOBKA 76-AAD
## MAALIYADDA HAWLGABKA

(1) Maaliyadda ku baxaysa hawlgabka shaqaalaha Dawladda waxa habaynaysa wasaaradda Maaliyadda.

(2) Maaliyadda hawlgabka waxa lagu maamulayaa xeer-sharciyeed (Decreto di legge) uu soo saaray Golaha Wasiirradu iyadoo uu tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

(3) Qofka kasta oo ka mid ah shaqaalaha Dawladda wuxuu ka bixinayaa boqolkiiba shan (**5%**) mushaharkiisa asaasiga ah si loogu biiriyo maaliyadda hawlgabka.

(4) Dawladdu bil walba waxay ku kordhinaysaa maaliyadda hawlgabka boqolkiiba shan (**5%**) mushaharka asaasiga ah ee qofka shaqaalaha dawladda ah. Lacagtaas waxa lagu haynayaa madax-xige u gaar ah ee miisaaniyadda Dawladda lamana wareejin karo si kharaj kale loogu bixiyo.

## QODOBKA 77-AAD
## HAWLGAB NAAFONIMO

(1) Xuquuqdiisa liiltir ama hawlgab ka sokow, qofkii shaqada dawladda uga fariista dhaawac naafonimo oo shaqada dawladda ku soo gaarey guddi takhaatiir dawladeedna soo qiimeeyeen xaddiga naafanimadiisa, wuxuu yeelanayaa xuquuqda yeelanayaa hoos qoran:

(b) **15%** mushaarkiisa aasaasiga ah haddii ay naafadu ka hoosayso **20%,** ama ay tahay naafo fudud.

(t) **25%** mushaarkiisa aasaasiga ah haddii ay naafadu u dhaxayso 20% iyo 35% ama ay tahay naafo dhexe.

(j) **100%** haddii naafadu ka sarrayso 35% ama ay tahay naafo culus.

## QODOBKA 78-AAD
## HORUMARIN HAWLGAB

Shaqaalaha hawlgabku ugu sugnaaday qod 73-aad ama 78-aad ee sharcigani haddii uu qoraal ku codsado, intaanu shaqada ka fariisan, waxa horumarin loo siin karaa ¼;

hawlgabka soo haray oo ah ¾ waxa la siinayaa bil kasta dhamaadkeeda.

## QODOBKA 79-AAD
## QOFKA SHAQAALAHA AH EE SHAQO QARAN KU GEERIYOODA

(1) Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawlgab welina shaqeyneyey uu geeriyoodo dhaawac gaaray isagoo gudanayaa hawlshii loo xilsaaray awgiis, waxaa la siinayaa deeq lacageed oo u dhiganta lix bilood mushaarkiisa aasaasiga ah.

(2) Haddii qof shaqaale ah ee hawlgabnimo (abaaldhurtenimo) aan weli gaarini geeriyoodo, dhaaawac gaaray isagoo gudanaya hawshii loo xilsaaray awgiis, waxa dadka dhaxalkiisa leh wax lagu siinayaa habka ku tilmaaman xubinta 1-aad ee qodobkan.

(3) Qofka shaqaalaha dawladda ah hadduu ku dhinto hawlgal ciidan ama dagaal, isagoo gudanaya hawl Qaran ama ka adeegaya goob dagaal oo daafacaya Dalka waxaa lagu xaq siinayaa sida uu dhigayo qodobka 19-aad xubintiisa 1-aad iyo tan 2-aad ee Sharciga Hawgabka iyo Liiltirka ee Ciidammada Qalabka Sida.

## QODOBKA 80-AAD
## XANNAANADA CARRUURTA WAALIDKOOD DHINTAY

(1) Haddii qof abaaldhurte ahi dhinto caruurtiisu waxay xaq u leedahay in bil walba la siiyo lacagtii uu abaaldhurtenimada u qaadan jiray ilaa ilmaha ugu yari ka gaarayo 18 sano.
(2) Qofka shaqaalaha ah ee mutaystay hawlgab welina shaqaynayey hadday ku timaado geeri caadi ah waxaa caruurtiisa lagu dhaqayaa sida ku xusan xubinta koowaad ee qodobkan.

## QODOBKA 81-AAD
## GEERIDA CAADIGA AH EE SHAQAALAHA AAN HAWLGAB GAARIN

Haddii qof shaqaale ah oo aan hawlgab xaq u lahayni u dhinto geeri caadi ah dadka dhaxalkiisa lihi waxay xaq u leeyihin lacag u dhiganta bil mushaharkeeda asaasiga ah sannad kastoo uu shaqeeyay, waxay kaloo Dawladdu siinaysaa deeq lacageed oo u dhiganta hal bil mushaarkiisa caadiga ah.

## QODOBKA 82-AAD

## WAAYITAAN IYO JOOJIN HAWLGAB

(1) Haddi qof shaqaale ah oo mutaystay hawlgab ay maxkamadi ku xukunto xarig isagoo shaqada dowladda ku jira ayna ku caddaadaan dembiyada ku xusan xaraka “T’ ee qodobka 53-aad ee sharcigan wuxuu isla markiiba waayayaa xaqa hawlgabka hase yeeshee waxa loo celin karaa lacagtii hawlgabka looga gooyn jirey.

(2) Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawlgab sida sharcigani qorayo ama hawlgabeen ah lagu xukumo dembiyo liddi ku ah Qarannimada Soomaaliyeed sida ku xusan qaybta 1-aad buugga labaad ee xeerka ciqaabta ciqaabtiisuna keeni karto dil, xabsi daa’in ama xarig aan ka yarayn 10 sano, wuxuu isla markiiba waayayaa xaqa hawlgabka.

(3) Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawlgab, sida sharcigani qorayo ama hawlgabeen ah ay maxkamadi ku xukunto xarig uga yimid dembi ka duwan kuwa ku xusan xubinta 1-aad ee qodobkan keenise karaya shaqo ka reebid muddaysan (temporary interdictions) waxa laga joojinayaa xaqa hawlgabka muddada uu ku sugan yahay xaaladda shaqada ka reebaysa.

## QODOBKA 83-AAD
## OGGOLAANSHAHA IYO BIXINTA HAWLGABKA IYO LIILTIRKA

Marka xiriirka shaqada ee ka dhexeeya qofka shaqaalaha ah iyo hay’addu dhammaado hawlgabka ama liiltirka waxa oggolaanaysa Wasaaradda shaqada iyo horumarinta shaqaalaha ka dib markii ay hesho talobixinta hay’addii uu u shaqaynayey qofku waxana bixinaysa wasaaradda Maaliyadda.

## QODOBKA 84-AAD
## HAWLGAB IYO LIILTIR AAN LA WAREEJIN KARIN

(1) Hawlgabka iyo liiltirka sharcigani xusayo laguma reebi karo cid kale lamana wareejin karo.

**(2)** Hawlgab ama liiltir maxkamaddu way joojin kartaa deyn ama waxyaabo kale oo Dawladdu qofka ku leedahay awgeed. Maxkamaddu waxay amar ku bixin kartaa joojin si loo gudo deyn laga galay dad gaar ah taasoo waafaqsan xeerka madaniga ah.

## QODOBKA 85-AAD
## HABAYNTA MUSHAAROOYINKA AASAASIGA AH EE SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLADDA

Mushaarooyinka aasaasiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda waxaa goyntooda u xilsaaran Guddi gaar ah oo ay xubnihiisa ka mid yihiin Wasaaradda Maaliyadda & Lacagta, Wasaaradda Shaqada & Horumarinta Shaqaalaha, Bankiga Dhexe, iyo Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

## QODOBKA 86-AAD
## HESHIIS SHAQO

Qof kasta oo shaqada Dawladda loo qoraayo waxay Haya'diisu la gelaysaa ama la saxiixanaysaa heshiis shaqo (contract) oo ay muddadiisu ku habaysan tahay baahideeda shaqo lana cusboonaysiin karo.

## QODOBKA 87-AAD
## BURIN

Waxa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

## QODOBKA 88-AAD
## DHAQAN GELID

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa markii uu ansixiyo baarlamaanku isla markaasna uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya.

| Darajada A |
| --- |
| A-1 |
| A-2 |
| A2-1 |
| A2-2 |
| A3-1 |
| A3-2 |
| A3-3 |
| A4 |
| A5-1 |
| A5-2 |

**LIFAAQA 1-AAD**

**QAYBTA (A): MAAMULAYAAL (ADMINISTRATORS)**

| |
|---|
| A5-3 |
| A6-1 |
| A6-2 |
| A6-3 |
| A7-1 |
| A7-2 |
| A7-3 |
| A7-4 |
| A7-5 |
| A8-1 |
| A8-2 |
| A8-3 |
| A8-4 |
| A8-5 |

| |
|---|
| B7-1 |
| B7-2 |
| B7-3 |
| B8-1 |

# QAYBTA (B) FULIYEYAAL (EXECUTORS)

| |
|---|
| **B8-2** |
| **B8-3** |
| **B8-4** |
| **B8-5** |
| **B9-1** |
| **B9-2** |
| **B9-3** |
| **B9-4** |
| **B9-5** |
| **B10-1** |
| **B10-2** |
| **B10-3** |
| **B10-4** |
| **B10-5** |

| Darajada D |
| --- |
| D12-1 |
| D12-2 |

| Darajada C |
| --- |
| C8-1 |
| C8-2 |
| C8-3 |
| C8-4 |
| C8-5 |
| C9-1 |
| C9-2 |
| C9-3 |
| C9-4 |
| C9-5 |
| C10-1 |
| C10-2 |
| C10-3 |
| C10-4 |
| C10-5 |
| C11-1 |
| C11-2 |
| C11-3 |
| C11-4 |
| C11-5 |

**QAYBTA (D) SHAQAALAHA AAN AQOON GAAR AH LAHAYN (AUXILIARIES)**

| |
|---|
| **D12-3** |
| **D12-4** |
| **D12-5** |
| **D13-1** |
| **D13-2** |
| **D13-3** |
| **D13-4** |
| **D13-5** |
| **D14-1** |
| **D14-2** |
| **D14-3** |
| **D14-4** |
| **D14-5** |
| **D15-1** |
| **D15-2** |
| **D15-3** |
| **D15-4** |
| **D15-5** |

# LLIFAAQA 2-AAD

## SHAXDA DARAJOOYINKA SHAQAALAHA FARSAMA-YAQAANKA

| **QAOYBYA A-AY** |
|---|
| DARAJADA 1AAD |
| DARAJADA 2AAD |
| DARAJADA 3AAD |

| **QAYBTA- F -** |
|---|
| DARAJADA 1AAD |
| DARAJADA 2AAD |
| DARAJADA 3AAD |

**SHAXDA DARAJOOYINKA SHAQAALAHA XIRFADLAYAASHA**

| **QAYBTA- X-** |
|---|
| DARAJADA 1AAD |
| DARAJADA 2AAD |
| DARAJADA 3AAD |
| DARAJADA 4AAD |
| DARAJADA 5AAD<br>(Kaaliye Xirfadle Farsamobarad) |

**HABKA FARSAMOYAQAANNADU UGU GUDBAAN FARSAMO – YAQAAN DHEXE IYO FARSAMOYAQAAN SARE**

| **DARAJO** | **TABABAR SHAQO** | **WAXA UU NOQONAYO** |
|---|---|---|
| FARSAMO -YAQAAN | 1 SANO-2 SANO | FAR. YAQ. DHEXE |
| FARSAMO- YAQAAN | 2 SANO | FAR. YAQ. DHEXE |
| FARSAMO- YAQAAN | 3 SANO | FAR. YAQ. DHEXE |
| FARSAMO-YAQAAN | 4 SANO | FAR. YAQ. SARE |
| FARSAMO-YAQAAN | 3 SANO | FAR. YAQ. SARE |
| FARSAMO-YAQAAN | 3 SANO | FAR. YAQ. SARE |

**LIFAAQA 3-AAD**

## LIISKA FARSAMOOYINKA LA AQOONSAN YAHAY

Halkan waxaa ku taxan Farsamooyin ilaa iyo hadda la aqoonsaday inay xeerka sharciga farsamooyinka waafaqsan:-

I- **Fisikal Saynisyahan**.

(1) Kimikiste
(2) Fisikiste.
(3) Farsamoyaqaanka cilmiga fisikada.

**II- Hindiseyaqaan dhismo, Injineero, iyo Farsamayaannada la xiriira hawlaha**

(1) Hindise yaqaan iyo magaalo dejiye.
(2) Injineer dhismo
(3) Injineer koronto iyo Elektaroonik.
(4) Injineer makaanik
(5) Injineer kimiko
(6) Injineer macdanta birta.
(7) Injineer macdan qode
(8) Injineer warshado yaqaan
(9) Dhulsimayaal
(10) Naqshad sameeye iyo guuriye
(11) Farsamoyaqaan Injineernimo dhismaha
(12) Farsamoyaqaan koronto iyo elektaroonikada
(13) Farsamoyaqaan Injineernimada makaanikada
(14) Farsamoyaqaan Injineernimada Kiimikada
(15) Farsamoyaqaan macdanta birta
(16) Farsamoyaqaan qodidda Macdanta.

**III- Madaxda Dayuuradaha iyo Maraakiibta**

(1) Duuliyaasha dayuuradaha, hogaamiyayaasha, Maraakiibta iyo Injineernimada duulista.

(2) Madaxda hagayaasha Maraakiibta iyo dayuuradaha.
(3) Injineer markab.

**IV- Santiisyada Nafleyda iyo Farsamoyaqaanadooda**

(1) Santiisyada dadka, dhirta iyo xoolaha
(2) Cayayaanka iyo Farmakoologist
(3) Agoronomiste
(4) Farsamoyaqaanada sayniska nafleyda

**V- Takhaatiirta Daawada, Ilkaha iyo Xoolaha**

(1) Takhaatiirta Daawada
(2) Takhaatiirta Ilkaha
(3) Kaaliye Takhtar
(4) Takhaatiirta xoolaha
(5) Kaaliye Takhtar Xoolaha
(6) Daawo diyaariye
(7) Kaaliye Daawo diyaariye
(8) Cunto yaqaan iyo nafoyaqaanka caafimaadka guud.
(9) Kalkaaliye aqoonyahan
(10) Kalkaaliyaal Farsamoyaqaan.
(11) Ummiliso Aqoonyahan
(12) Ummiliso Farsamoyaqaan
(13) Farsamoyaqaanka indhaha iyo diyaarinta muraayadda indhaha.
(14) Fisiyoterabiste iyo Terabiste
(15) Farsamoyaqaan Raajo.

**VI- Xardhayaal iyo Sawirlayaal**

(1) Xardhayaal

(2) Filim qadaal iyo Sawirlayaal

VII- Beeraleyda, Xoolodhaqatada, Seeraleyda, Kalluumaysatada iyo Ugaarsatada

(1) Beeridda Badarka iyo Khudaarta.
(2) Beeridda Miraha kala geddisan
(3) Farsamoyaqaanka dhaqidda Xoolaha
(4) Farsamoyaqaanka Caanaha Xoolaha
(5) Tallalka Beeraha
(6) Ku Shaqynta Makiinadaha Beeraha
(7) Dhaqaalaynta iyo abuuridda dhirta
(8) Kalluumeysiga
(9) Dhaqidda Digaagga.

**VIII- Wax-soo-saarka iyo ku shaqeynta Makiinadaha tacab soo saarka**

(1) Qodidda Ceelasha iyo Macdanta
(2) Farsamoyaqaanka macdanta iyo dhagaxa

**IX- Soo saaridda Birta**

(1) Dhalinta Birta, Beddelka iyo ku safeynta moofada
(2) Ka sameynta birta dhalaalsan qalab
(3) Ka dhalaalinta birta moofada
(4) Sameynta Birta
(5) Adkeynta Birta
(6) Ka sameynta birta tubooyinka iyo xargaha korontada
(7) Macdaneynta qalabka birta iyo dahaaridda

**X- Diyaarinta Qoryaha iyo Sameynta qoryaha**

(1) Farsamada diyaarinta qoriga
(2) Miishaareynta qoriga iyo soo saaridda qoriga
(3) Xalluufinta qoriga
(4) Sameynta warqadaha

**XI- Ku shaqeynta kiimikada**

(1) Waqiijin, Budeynta, iyo Qaldada Kiimikada (Grinders & Mixers)

(2) Karinta umadda iyo dab yaqaan (Roasters iyo heat treaters).
(3) Shaandhaynta iyo kala soocid-yaqaanka (Filters iyo separator operators).
(4) Safeynta Batroolka.
(5)

**XII- Farsamo yaqaanka Miiqidda, Falkinta iyo ka shaqeynta dharka**

(1) Diyaarinta dunta iyo suufka
(2) Miiqidda iyo duubidda Dunta
(3) Filkinta, Iskugaynta iyo diyaarinta karaka naqshadaha.
(4) Filkinta
(5) Tolidda
(6) Sibaaqaynta, Midabeynta iyo dhammeystirka dharka

**XIII- Hoodhinta Magdhinta kala soocidda saanta iyo dhogorta**

(1) Hoodhinta iyo Magdhinta
(2) Hoodhidda Dhogorta

**XIV- Makiinadaha sameynta Cuntada iyo Cabidda**

(1) Shiididda Badarka
(2) Shiididda safeynta Sonkorta
(3) Hiliblayaasha
(4) Kaydinta Cuntada iyo Cabidda
(5) Kala miiridda Caanaha, Burcadka iyo Farmaajada.
(6) Sameynta Burka iyo Nacnaca.
(7) Sameynta Khamiirka iyo Akolka.

**XV- Diyaarinta Buuriga iyo soo saariddiisa**

(1) Diyaarinta Buuriga
(2) Sameynta Sigaarka.

**XVI- Dawaarlayaasha, Dhartolayaasha, Makiinadyaqaan iyo Tolidda Dharka**

(1) Dawaarlayaasha iyo Dhartolayaasha

(2) Dawaarlayaasha dharka Suufka ah
(3) Tolidda Koofiyadaha raga iyo dumarka
(4) Googoynta, Naqshadeynta Dharka
(5) Tolmo yaqaan iyo daabac sameeye
(6) Tolidda dharka adag

**XVII-Kabatolayaasha iyo sameynta Saamaha**

(1) Kabotolayaasha iyo kabohagaajiyayaasha
(2) Googoynta kabah, cabirayaasha iyo gacan ku tolidda
(3) Tolidda qalabka saamaha

**XVIII- Sameynta alaabta guryaha iyo Farsamada Qoriga**

(1) Sameynta alaabta Guryaha
(2) Ku shaqeynta Makiinadda Qoriga

**XIX- Googoynta Dhagaxa iyo Xardhinta**

(1) Googoynta Dhagaxa iyo Xardhinta

**XX- Birtumidda, Qalab sameynta iyo ku shaqeynta Makiinadda Qalabka**

(1) Bir tumidda, Dubeynta iyo Moo feynta Birta
(2) Qalab sameyn, Naqshad sameynta Birta iyo Bir sameynta
(3) Ku shaqeynta Makiinadda qalabka sameysa ee iswadda
(4) Ku shaqeynta Makiinadda Qalab sameynta
(5) Xoqidda, Xayraynta iyo Afeynta Qalabka wax gooya.

**XXI- Sameyn Qalabka Cabirka, isku gaynta Xubnaha Makiinadaha iyo Makiinad sameynta.**

(1) Makiinad sameynta, isugaynta iyo Toonada.
(2) Sameynta Saacadaha (Waaweyn iyo Yar-yar) iyo qalabka cabirka
(3) Sameynta Baabuurta
(4) Sameynta Makiinadaha Dayuuradaha

XXII- **Sameynta Makiinadaha Korontada iyo Elektaroonikada**.

(1) Sameynta Korontada

(2) Sameynta Elektaroonikada
(3) Isku gaynta Xubnaha Korontada iyo Elektaroonikada
(4) Hagaajinta Raadiyaha iyo Raadiyaha la iska arko (TV)
(5) Galiyayaasha Taleefoonka iyo Telegraraafiyada
(6) Dhigidda Xargaha Korontada iyo isku xirkooda

**XXIII- Idaacadaha iyo Qalabka Codka Dheehaya**

(1) Farsamoyaqaan Idaacadda
(2) Farsamoyaqaan qalabka dhawaaqa iyo Filim wadayaasha

**XXIV- Tubiste, Alxanle, Safeexad yaqaan Bir dhismo**

(1) Tubiste iyo Dhuunyaqaan
(2) Alxanle iyo olokujire
(3) Safeexad yaqaan
(4) Bir dhismo diyaariye iyo dhise

**XXV- Dahable iyo Macdan ka shaqeeye**

(1) Dahable, Qalinle iyo macdantume

**XXVI- Quraarad sameeye**

(1) Quraarad sameeye, Gooye, Xaquuqe iyo Dhameystire
(2) Sameynta dhoobada iyo Qalab xaxuuqe
(3) Moofeynta quraaradda iyo Jeermikada
(4) Xardhidda Quraaradda
**(5)** Rinjiyeenta iyo Naqshadeynta quraaradaha

**XXVII- Sameynta Cinjirka iyo Caagga**

(1) Sameynta Cinjirka iyo Caagga
**(2)** Sameynta Lugaha Cinjirka iyo Caagga

**XXVIII- Sameynta Warqadaha iyo Kaartoonada**

(1) Sameynta Sanduuqa Waraaqaha iyo Kaartoonada

## XXIX- Daabacaadda

(1) Diyaarinta Xuruufta daabacaadda (gacanta iyo makiinadda).
(2) Ku shaqaynta makiinadaha daabaca xaashiyaha safeexadaha iyo kuwa la xiriira.
(3) Samaynta safeedaha daabaca ah (Stereotypes and Electypers).
(4) Xardhaynta sawirka.
(5) Xardhinta qalabka daabaca.
(6) Samaynta jaldiyada buugaagga, wargeysyada iyo daabicidda xuruufta waaweyn.
(7) Daabaca midabyada, filimmada iyo sawirka.

## XXX- Rijiye (Rinjiye)

(1) Rinjiye dhisme.

## XXXI- Wax-Soo-Ssaarka

(1) Samaynta iyo hagaajinta qalabka muusikada.
(2) Tolidda kolayada iyo xaaqimaha.
(3) Samaynta shubka waxyaabaha kala geddisan.

## XXXII- Fuundiga, Injineerka iyo Dhismaha

(1) **l**eban-dhigaha, dhagax dhisaha iyo marmar dhigaha.
(2) Diyaarinta Shubka, dhammaystirka shamiitada.
(3) Saqaf sameeye (Floorers)
(4) Najaarnimo iyo qoryo-isku-hagaajiye
(5) Gidaar salaaxe
(6) Gelinta gidaarka qalabka, dhuumaha iyo qaboojiyaha
(7) Quraaradaynta albaabada iyo daaqadaha
(8) Dhismaha

## XXXIII- Makiinadaha abuuridda korontada, biyokariyaha iyo Tallaajadaha

(1) Makiinadaha qaybinta xoogga korontada, neefta iyo biyaha

(2) Makiinadaha ceelasha biyaha

**XXXIV- Makiinadaha Soo Saaridda Shixnadaha**

(1) Ku shaqaynta makiinadaha rogidda iyo raridda
(2) Hagaajinta keybalada iyo ku shaqaynta makiinadaha wax jiida
(3) Makiinadaha carro guridda
(4) Ku shaqaynta wiishashka iyo kareenada

**XXXV- Gaadiidka**

(1) Hagaajinta Makiinadaha Maraakiibta
(2) Hagaajinta iyo wadidda kareennada
(3) Wadidda Baabuurta
(4) Hagaajinta makiinadaha baabuurta

XXXVI- **Hawl**

(1) Cunto Kariye
(2) Safaynta dharka iyo kaawiyadaynta
(3) Timo hagaajiye iyo xiire
(4) Dab-damiye